



DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA
XAFIISKA QORSHAYNTA

WARBIXINTA WAXQABADKA XAFIISYADA
HEER DEEGAAN

AFAGAAL 2023 – AGAALI 2024
(HAMEL 2014 – SANE 2015 T.I.)

Agaali 2023 (HAMLE, 2015 T.I.).

Jigjiga

Tusamada Warbixinta

1.	Hordhac.....	1
1.1.	Gogol-dhig.....	1
1.2.	Hannaanka la Raacay (Methodology).....	1
1.3.	Xaaladda Halbeegyada Dhaqaalaha Guud (Macro-Economic).....	2
2.	Xafiiska Nabadgalyada	3
3.	Xafiiska Cadaalada	7
4.	Ka-Midho-Dhalinta Mashaariicda Dhismaha ee Heer Deegaan.	9
5.	Xafiiska Biyaha.....	11
6.	Xafiiska Waraabka & H/Dooxxoyinka	13
7.	Xafiiska Beeraha	15
8.	Xafiiska Horumarinta Xoolo-dhaqatada	20
9.	Xafiiska Waxbarashada	22
10.	Xafiiska Caafimaadka	27
11.	Xafiiska Horumarinta Magaalooyinka & Dhismaha.....	29
12.	Xafiiska Jidadka	31
13.	Xafiiska Xirfadaha & Shaqo Abuurka.....	32
14.	Xafiiska Ganacsiga & Gaadiidka	34
15.	Xafiiska Warshadaha, Maalgalinta & Qurbojoogta	37
16.	Xafiiska Macdanta iyo Tamarta	39
17.	Ilaalinta Deegaanka & Maamulka Dhulka Miyiga ah.....	41
18.	Xafiiska Maaraynta Khataraha (DRM).....	43
19.	Xafiiska Shaqada & Arrimaha Bulshada	46
20.	Xafiiska Haweenka iyo Caruurta	48
21.	Xafiiska Ciyaaraha iyo Dhallinyarada	50
22.	Xafiiska Curinta Iyo Technology	53
23.	Dhaqanka iyo Dalxiiska	54
24.	Xafiiska Warfaafinta.....	56
25.	Xafiiska Adeegga Shacabka	58
26.	Xafiiska Qorshaynta	60
27.	Xafiiska Maaliyadda DDS.....	63
28.	Xafiiska Dakhliga.....	69

1. Hordhac

1.1. Gogol-dhig

Xukuumadda Deegaanka Soomaalidu waxay sanadkan 2015 xooga saartay ka midhordhalinta qorshayaasha horumarineed ee lagu kobcinayo nolashaha bulshada, laguna yareeynayo saboolnimada. Waxaana qorshayaashaas aas –aas u ahaa barnaamijyada **Dalag Iyo Daryeel, Dhaqo Oo Dheefso, Sugida Amniga, Iyo Kor Uqaadida Kaabayaasha Dhaqaalaha**.





Haadaba, iyadoo laga duulayo qorshayaashaas horumarineed (**Developmental Plans**) ayaa waxaa la sameeyay qiimeeyntii guud ee qorshayaasha xafiisyada heer deegaan ee warbixinta waxqabadka SM 2015. Waxaana aasaas u ahaa saddex qodob oo kala ah:

1. Qorsha-howleedka SM 2015 ee la diyaariyey dhammaadkii SM 2014. Qorshahaaas oo ku salaysnaa mudnaan kala siinta la isla gartay in jiho ahaan lagu shaqeeyo sannad miisaaniyadeedka 2015.
2. Warbixinta faahfaahsan ee waxqabadka Xafiisyada SM 2015
3. Qiimaynta waxqabadka xafiisyada ee wadajirka uga qaybqaateen Xafiiska Golaha fulinta, Xafiiska Qorshaynta & Xafiiska Madaxtooyada DDS.

1.2. Hannaanka la Raacay (Methodology)

1. Hannaanka Qorshe & Warbixin Mid ah (**One Plan Versus One Report**)
2. “Natijada ku salaysan Ka-Midho-dhalinta Halbeegyada Waxqabadka Muhiimka ah (**Key Performance Indicators (KPI)**).
3. Qiimaynta hogaaminta ee dhinaca horumarka (**Performance**) oo ah **70%**, dhinaca siyaasaddana/wada-shaqaynta **30%**

1.3. Xaaladda Halbeegyada Dhaqaalaha Guud (Macro-Economic)



2. Xafiiska Nabadgalyada

Qorshaha sanad miisaaniyadeedka 2015 wuxuu qayb ka yahay oo laga soo deegay qorshaha 10ka sane ee Xafiiska

Udubka 1^{aad}: ka hortegga, maaraynta iyo xallinta khilaafaadka iyo dhisidda nabadgalyada

Xallinta isku-dhacayada Deegaanka gudahiisa

- Waxaa hoos loo dhigay iskudhacyada ka jiray deegaanka gudahiisa iyadoo gundhigu ahaa **52%** hoosna loo dhigay **45%**. Guud ahaan waxaa gacanta lagu hayey **22** iskudhac oo kasoo wareegay SM 2014. Waxaa si buuxda loo xaliyey loo dhigay **10** isku dhac iyadoo hadda gacanta lagu hayo lana xakameeyey **12** isku dhac Isku dhacyada la xalliyey waxaa ka mid ah kuwa ka dhacay degmooyinka Shilaabo, Babuli, Ararso, Mulla-Bilcin-Bur, Xarshin-Yocale, khilaafyo loo sogudbiyey heer deegaan oo la xalliyey (Wardheer, bookh, Galaadi iyo Lehel-yucub) iyo Tulli-guled)
- Waxaa darasad laga soo sameeyay **5** degmo, darasadaas oo ku saabsanayd “khariidadaynta isku-dhacyada **Conflict Mapping**”
- Waxaa la xoojiyay Kahortaga & xallinta khilaafaadka qowmiyaadaha aan dariska nahay (Oromia & Cafar)

Dhanka degaanka Oromia

- Labada degaan ee Somalida iyo Oromada ayaa tan iyo inti isbadalka siyaasadeed degaanka ka hana qaaday ku hawlana sidi mesha loga saari laha coladihi gacan ku samayska ahaa ee labada shacab la dhax dhigay sido kalena xal waara loga gaadhi laha khilaafaadka jiray, taas oo keentay in lagu gulaysto meeshna laga saaro coladi.
- Hase ahaate waxaa mudadan danbe gaarahan sanadkan dhamaadka ah ee 2015 waxaa soo kordhayay ififaalada khilafaad iyo colada ee degmooyinka dariska la ah degaamka Oromai gaar ahaan, Gura-dhamole, Tuli-Guleed iyo kuwo kale oo xududa ku labada degan ku yala. Khilafka dhanka degaanka Oromia oo aan ahayn mid labada shacab oo kaliya balse salka ku haya hay’adaha dawlada, sidaas daradeed u bahan xal siyaasi ah si loo ilaaliyo nabada labada deegaan ee dadaalka adag loo galay.

- Sido kale dhanka Oromia waxaa si kordhayaa goobaha khariirada Oromia la galiyay ee ka tirsan degaanka somalida (Google Map /Oromia region map) iyo degmo cusub oo Oromia fadhigeeda ka samaysay goob -pocket ah oo ku dhex taala degaanka Somalida

Dhanka degaanka Canfarta

- Deegaanka Canfarta ayaa bara-kicin iyo werar joogto ah ku hayay shacabka Somaliyeed ee galbeedka Gobalk Sitti walina werarogoos-goos ah ka sameeya agaas gaar ahaan lixdii bilood ee danbeeyay, colada dhanka deegaanka Canfarta ayaa ah mid u bahan xal siyaasi ah iyo mid dhanka shacrcigaa dalka ah.
- Hirgalinta nidaamka digniinta hore ee isku dhacyada beelaha iyo qowmiyaha,
- Waxaa la kobciyay aqoonta iyo khibrada ku aadan nidaamka digniinta hore ee isku dhacyada **(conflict early warning system)** ee xirfadleyaasha geedi-socodka xalinta khilaafaadka, tababar ku soo qateen xidhmooyinka dhaqan galinta nidaamka digniinta hore wasarada nabada ee dalka. tababarkaas ayaaa quseyaya, habka dajinta iyo maaraynta nidaamka digniinta hore ee heerarka kala duwan, isticmaalka alaadaha digniinta hore hore, nidaamka xog ururinta, falanqaynta, isticmaalka iyo maraynta xogaha digniinta hore.
- Waxaa la diyaariyay qolka hagista nidaamka digniinta hore ee deegaanka iyada oo lagu qalabeeyay kuras iyo miisass, iskiiriin tv iyo kombiyuutar

Waxqabadka Geedi Socodka Dhisidda Nabadda (Peace building)

- Si hoos loogudhigo faldanbiyeedyada ay galaan dhalinyarada abaabulan **(jayna guruubka)** xafiisku wuxuu qabtay shaqooyin isugu jira dhismaha naadiyada nabadda ee Dugsiyada Sare iyo Kuliyada ismaamul magaalooyinka, maaadama oo dhaliyarada gaysata faldanbiyeedyada abaabulan ay badankoodu yihiin arday wax ka barata dugsiyada sare ee dowlada; iyada oo dhinaca dhalinyarada maamul magaalooyinka loo qabtay shirar wacyigalin ah.
- Si loo xaqiijiyo doorka ka qaybgalka dhisida nabada ee dhalinyarada, waxaa kuuliyadaha maagalada Jijiga iyo dh/buur laga dhisay kilaabyada nabada, si hoos loogu

dhigo ardayda ku biiraysa dhalinyarada Jaynaa guruubka ee amni darada ka sameeyo magaalooyinka.

- Waxaa la turjumay oo lagu shaqayn doonaa **7** document oo wasarada nabada laga keenay kuwaas oo shaqada geedi socodka nabada gundhig u ah.

Udubka 2^{aad}: Ka hortegga iyo xakamaynta danbiyada isteraatejiga ah iyo soo baxaya Dabagal Adeeg bixinta Hay'adaha Nabadgalyada

- Xafiiska Nabadgalyaada iyo xafiisyada iyo komishinada ay bahwadaagta yihiin waxay qabteen kormeerro wada jir ah oo kala duwan
- Waxa la tarjumay **5** dokument oo aas-aasi u ah dhisida hay, adaha nabadgalayda kuwaas oo dhawaan lagu shaqayn doono
- Waxaa tababar lagu xoojinayo garaadkooda aqooneed loo qabtay in ka badan **200 qof oo ka tirsan Booliska DDS**, tababar lagu baranayay cashiro la xidhiidha, anshaxa, mabaadiida, caqiido, halbeegyada ciidanka boolisk qaranka, kahortaga dambiya, iskuxidhka booliska iyo bulshada.

Xoojinta Sarraynta Sharciga (law Enforcement Institution)

- Taraafikada heer-deegan waxay ku xadgudubka xeerka gaadiidka ku soo ganaaxeen darawaliin dhan **17,166** laguna ganaxay lacag dhan **16,977,307-birr** kuna xarootay account-ga dawlada. Dhanka kale waxaa la qabtay lacag sharci daro ah oo dhan **504,900dollar**.
- Waxaa Suurada Faraha Laga Qaadey Dad tiradoodu dhantahey **346** oo isugu jira rag iyo dumar waxaana Danbi la'aan loo cadeeyey tiro dhan **226 halka 13** Danbile lagu cadeeyey dhanka kalena **107 qof oo Al-Shababayasha ayaa Faraha Laga Qadey**
- Waxaa sharciga la hor keenay ku eedaysanayaal **1,007** danbiyada kala duwan ee ka dhaca magaalooyinka iyo danbiyada istraatigiga ah ee halista ah sida Tahriibinta iyo ka ganacsiga bani-aadamka. Waxaa la qabtay oo dib loo celiyey tahriibayaal dhan **1,466** Waxaa kaloo la qabtay **38** magafe iyo Gaadiidka wax lagu tahriibiyo oo dhan **4** gaadhi iyo **1** bajaja.
- Hubka sharci darada ah waxaa la qabtay Hubka Sharci darada ahoo kala ah **9** qori oo AK47 iyo Rasaasta Ak47 **1129** xabo sidoo kale **26** bastooladood

- Ka ganacsiga maan-doriyashaasha **126kg(Canabis)** Iyo Kokayin iyo **16** box iyo **23** Xidhmo sidoo kale **2** gaadhi oo **xashishad** waday iyo **9** eedayane
- Tuuga koox-kooxda ah iyo danbiyada abaabulan **37**
- Waxaa wacyigalin la xidhidha saraynta sharciga la siyay shacab dhan **5.6** million
- Waxaa komishinada **11** Gobol iyo **6** maamul magaalo tababar lagu siiyay xarunta tababarada ee Sandhafa.
- Waxaa la qiimayay sarakisha ciidanka maleeshiyada ee Gobalda, degmooyinka iyo maamul magalooyinka sidoo kale waxaa tiro koob madax taabasho ah lagu sameeyay ciidanka maleeshiyada,
- Ciidanka maleeshiyada ayaa qabtay hub sharci daro ah oo kal ah **35 AK7,1RPG** iyo rasaas dhan **21,500**

Udubka 3^{aad}: Xaqiijinta ka qayb-qaadashada iyo isku xidhnaanta bulshada ee nabadgelyada

- Waxaa kormeer dhanka nimaadka Nidaamka Taageerada Iyo Dabagalka Adeeg Bixinta Hay'adaha Nabadgalyada Ee G. Afdheer, Libaan Iyo Dhawa lagu soo sameeyay, ujedada kormerka ayaa hayd in la darsano lana takuleeyo xafiisyada nabadgalyada ee gobalda ee dhanka
- Nidaamka qaabilaada shacabka
- Nidaamka qaabilaada cabshada bulshada
- Nidaamka qorshe ku shaqaynta xafiiska hogaanada, Komishinada gobolka iyo council.
- Nidaamka gudi ku shaqaynta iyo gudiyada aas-aasiga ah ee ka jira
- Habraacyada hadal qoraalka iyo warbixinaha
- Waxaa sixitaan iyo hoga-tusaalayn lagu sameeyay meelaha ay goldalooladu ka jiraan ee dhanka qorshe ku shaqaynta iyo adeeg bixinta hay'adaha nabadgalatada ee sadexda gobal eekor ku xusan.
- Waxaa shir wada-tashi ah loo qabtay hay'adaha ka shaqeeya sectorka nabadgalyada gaar ahaan hawlaha xalinta khilafaadka iyo dhisida nabda halkaas oo lagu sameeyay madal gaar u ah kooxaha ka shaqeeya dhinacyadaas si ay wax u kala bartaan, xogahana u kala qataan, isla markaasna la jihayn karo.

Dib U Habaynta Hay'adaha Amniga Deegaanka

- Waxaa sanadkan dhamaadkisa la hirgaliyay dib u habaynta labada ciidan ee xoogga gaarka ah ee degaanka iyo koomishinka booliska degaanka. Qorshaha dib u habaynta ciidamada oo ahaa qorshe heer qaran oo laga hirgaliyay dhamaan degaamada dalka, isla markaas ahaa dib u habayn xasaasi ah una bahnayd in lo mareeyo si xikmadi ku jirto ayu degaanku ku gulaystay in u hirgaliyo, iyadoo laga feejignaa in aan lawajihin

3. Xafiiska Cadaalada

Ayadoo laga duulayo qorshihii lixda bilood islamarkaasina laraacayo tiirarka, yoolasha iyo jahooyonkii uu qaatay xafiiska cadaalada dds, waxaa uqabsoomay shaqooyinkan hoosta kucad

- Ayadoo laga duulayo dib uhabayntii hay adaha cadaalada waxaa lasiiyey tababaro dhinaca sharciga **1355** xirfadle sharci oo isugu jira xeer ilaalin asluub, xubno garsoor iyo baarayaal boolis ah.
- Waxaa markii ugu horeysay lagu guulsystay in la aruuriyo dhamaan bayaanadii iyo xeer nidaamiyaashii deegaankeenu soosaray laguna shubay **website** loosameeyey taasoo hada kadib sifudud looga helikaro.
- Waxaa halbuug lagu aruuriyey islamrkaasina ladaabacay sharciyadii baarlamaankeenu soosaray **afartii sano** e lasoo dhaafay (2011—2014) kuwaas oo dhan **42** bayaan.
- Waxaa luuqada somaliga ah lagu turjumay isla markaasina ladaabacay **17** sharci oo muhiim u ah saraynta sharciga iyo cadaalad marinta dambiyada kuwaas oo isugu jira kuwa caalamiya iyo kuwo dalkeenaba.
- Siloo taakuleeyo xafiisyada heer gobol waxaa qalabayn loo sameeyey xafiisyada cadaalada **11**gobol. sidookalena waxaa lasoo iibiyey **3** bajaj oo xafiisku adeegsado
- Waxaa sharciga la horgeeyey **3,685** oo fayl oo ay ku edaysanyihiin **5,301qof** oo sharciga ku xad gudbay ayagoo **3,627** faylookamid ah laxukumay **unadhiganta 98.4%** ayna jeelasha kujiraan, intakalena wali kiiskoodu socoto taasoo fiiro gaar ah lasiiyey ladagaalanka dambiyada **dilka, kufsigu, xashishada, musuqa iyo Alshabaabka**.
- Waxaa sharciga lahorgeeyey **78** qof oo ah kiisas hantidhawku soo gudbiyey kuwaas oo ku edaysan hanti dhan **62,000,000 bir (sodon iyo labo milyan)** taasoo qaarkamid ah laga sooceliyey hantidii ay musuqeen oo dhan **21,600,000** taasoo udhiganta **34.8%**

- Waxaa korloo qaaday kaqaybgalka dacwadaha madaniga ah ayadoo dawlada laga difaacay **208 Million Birroo** ladoonayey in khasnada dawlada lagala boxo ayadoo la adeegsanayo go'aamo maxkadaha heer fadaral ah.
- Xafiiska cadaaladu wuxuu dadaal wayn galiyey sidii loohelilahaa lacagaha kamaqan xafiiska shaqo abuurka ayado dacwadihii la oogeey awgeed dibloo sooxareeyo **84,165,563.36 Birr (70.2 Mil)**
- Waxaa wacyigalin dhinaca sharciyada lasiiyey bulsho dhan **1,223,704 qof** oo kunool gobolada kaladuwan ayadoo sidookalena la hirgaliyey barnaamijkii sharciga iyo bulshada kaasoo **SRTV** kabay **42 jeer** 12ki bilood aan soodhafnay dadkana loogu sheegayey xuquuqdooda iyo iney kadheeraadaan dambiyada cawaaqibkooda.
- Waxaa kormeer lagu sameeyey xarumaha dhaqan celinta asluubta iyo saldhigyada booliska **9 gobol** ayadoo saldhigyada laga siidayey **182** maxbuus oo sifo sharciga kabaxsan kuxirnaa waxaana sidookale lakordhiyey garamka cuntada maxabiista oo lagarsiyey **53 bir** qofkiiba halkay ka ahayd **18 bir**.
- Waxaa maxaabiista loosoo iibiyey qalabka baris barasho ee farsamada gacanta si loogu baro xirfad ay mustaqbalka kushaqaystaan marka dhaqantoosintu udhamato.
- Waxaa sidookale lasoo iibiyey daawada maxaabiista waxaana lagaarsiiyey dhamaan xarumaha dhaqan celinta.
- Ayadoo laga duulayo qarshaha dib uhabayntii hay, adaha cadaalada waxaa waxbarsho loogu xareeyey jaamacada jigjiga **240** xeer ilaaliye kuwaas oo aan horey sharci ubaran Halka **112** xubnood oo anshax xumo kukacay laga saaray xerilalinta qiimayntoodii kadib dhinaca kalena ladalacsiyey **42** xubnood oo **12** kamid ah tahay haween loona dalacsiyey xerilaalin heer deegaan iyo gobol ah.
- Waxaa daraasaad kooban lagu sameeyey dhamaan xafisyada, komishinada iyo wakaaladaha dds si loo ogaado goldaloolooyinka iyo baahida loo qabo sharciyo cusub iyo inlabadalo sharciyadii gaboobey.
- Waxaa markii ugu horeysay deegaanka laga sameeyey daraasad kusabsan xogta dambiyada iyo sabaha keena taasoo dhawaan laga soosaari doono siyaasado cusub oo dambiyada lagula dagalamayo.


- Waxaa kormeero xog uruurin iyo waliba sixitaan lagu sameeyey dhamaan waaxyaha adeeg bixinta cadaymaha kaladuwan ee xafiiska cadaalada iyo hanaanka dakhli qabashada ee adeeg bixintaas.
- Waxaa adeega damaanadaha, cadaymaha heshiiska iibka, sharcisiinta shirkadahalasiyey dad dhan **6,986** dhamaan gobolada iyo heer degaanba ayna kasoo xarootay lacagdhan **77,414,079Birr. (milyan)**
- Waxaa ladiyaariyey islamsrkaasina laturjumay manhajkii waxbarashada machadka tabarada hay, adah caddalada.
- Waxaa ladiyaariyey **7** bayaan oo cusub loona taasoo barlamanku ansixiyey iyo **5** bayaan oo hada kalfadhiga horyal.
- Waxaa sifiican looga hirgaliyey xafiiska cadaalada hanaanka adeeg bixinta maamulka suuban iyo bilicda xafiiska.
- Waxaa gacanta qiimaynti sanadlaha ee xee-ilaalinta dds si loo adkeeyo isla xisaabtanka iyo xilgudashooda.
- Waxaa socda mashriica database oo loosamaynayo waaxda cadaymaha iyo heshiisyada.

4. Ka-Midho-Dhalinta Mashaariicda Dhismaha ee Heer Deegaan.

Guud ahaan mashaariicda dhismaha ee Xafiisyada heer deegaan ka wadaan gobolada, degmooyinka iyo maamul-magaalooyinka waxaa lagu soo koobay 312. Guud ahaan mashaariicda dhammaaday waxa tiradoodu dhan tahay 101 (33 waxay dhammaadeen waanay bixiyaan adeeggii loogu talagalay halka iyo 68 ay dhammaadeen laakiin aan wali laga shaqaysiin); 28 waa mashaariic cusub oo loo dhammaystiray qandaraas-bixintii oo hadda ku jira abaabulkii shaqo bilaabidda (**Mobilization**). 97 mashruuc si fiican ayey u socdaan waxay marayaa celcelis ahaan meel fiican. 86 mashruuc ayaan shaqo ka soconin.

Shaxda 1aad Xaaladda Mashaariicda oo ku salaysan Xafiis

Xafiiska	Mashruuc cusub- shaqo lama bilaabin	Wuu dhamaaday wali ma shaqeeyo	Wuu dhammaaday wuuna shaqeeyaa	Wuu socdaa	Wuu taagan yahay (shaqo kama socoto)	Isugayn
Baarlamaanka				1		1
Beeraha	1	4	2	1	2	10
Biyaha	10	9	11	21	21	72
Caafimaadka	3	6	22	14	15	60
Cayaaraha			1	1	5	7
Curinta				1		1
Dakhliga			1		1	2
Dhaqanka Iyo Dalxiiska			1			1
Ganacsiga & Gaadiidka				1	2	3
Hanti-Dhowrka					1	1
Horumarinta Magaalooyinka	1	6	12	14	6	39
Jidadka	1		1	9	10	21
Kulliyadda Caafimaadka Jigjiga		1		3		4
Maaliyadda				1		1
Maaraynta Khataraha				2		2
Macdanta			1			1
Nabadgalyada	1			1	3	5
Wak. Warfaafinta					1	1
Waraabka	11	5	2	13	6	37
Waxbarashada			3	11	4	18
Xirfadaha			3	3	9	15
Xoolo-Dhaqatada		2	8			10
Isugayn	28	33	68	97	86	312



Jaantus 1 Jaantuska 2aad: Xaaladda Mashaariicda Dhismaha la kormeeray




Figure 2 Jaantuska 2aad: Tirada Mashaariicda la Kormeeray iyo Gobolada

5. Xafiiska Biyaha

Qorshayaasha Xafiiska ee SM: 2015 udub dhexaad looga dhiggo mashaariicaha laga filayo iney natiijo la taaban karo ka keeni karaan:

1. kor u qaadidda helitaanka adeegga biyaha nadiifta ah iyo fayadhowrka, (**Increase access safe water supply**),
2. ka jawaabidda yareynta saameynta abaaraha (**Drought emergency response**)
3. Dhisidda nidaamka adkeysiga gaar ahaan adeegyadii horay u sii jiray (**Resilience system in the existing schemes**). Sidaas darteed, si looga midho dhaliyo qorshayaasha la hiigsanayo ayaa xafiisku SM 2015 dejiyey dhowr **halbeeg** oo waaweyn kuwaasoo lagu cabirro shaqada qorsheysan sanadkan, kuwaasoo kala ah:
 - **Halbeega 1aad.** Kor u qaaditaanka helida biyaha nadiifta ee Deegaanka iyadoo laga qaadayo **39.4%** lana gaadhsiinayo **45%**
 - **Halbeega 2aad.** Kor u qaaditaanka helida biyaha nadiifta ee magaaloooyinka iyadoo laga qaadayo **45%** lana gaadhsiinayo **49%**
 - **Halbeeg 3aad.** Kor u qaaditaanka helida biyaha nadiifta ee Miyiga iyadoo laga qaadayo **37%** lana gaadhsiinayo **43.5%**

- **Halbeeg 4aad.** Yaraynta heerka ilo-biyoodiyada aan shaqayninin iyadoo laga qaadayo **25%** lanaga gaadhsiiyayo **22%**.
- **Halbeeg 5aad.** Heerka kor qaadidada isticmaalka tamarta qoraxda iyadoo laga qaadayo **13%** lana gaadhsiiyayo **16%**
- **Halbeeg 6aad.** Heerka kor u qaadidada isticmaalka laydhka 24/s iyadoo laga qaadayo **10%** lana gaadhsiiyayo **12%**
- **Halbeega: - 7aad.** Heerka Yaraynta biyaha luma iyo biyaha aan dakhliga lagaa soo xaraynin iyadoo laga soo qaadayo **39%** Lana gaadhsiiyayo **37%**.

Halbeegyada Waxqabadka la gaadhay (KPI)

- Qorshaha halbeega heer daboolka biyaha ee heer deegaan SM 2015 wuxuu ahaa in laga qaado heer daboolka adeega biyaha nadiifta ah **39.4%** lana gaadhsiiyo **45.1%**. Hadaba, iyada oo lagu saleynayo qorshaha 12-kabilood waxqabadka waxa adeeg biyo nadiif ah helay bulsho dhan **310,017** oo u dhiganta **4.0%**, taasoo ka dhigan in heer daboolka biyaha nadiifta ah ee 12-ka bilood la gaadhay qiyaas dhan **43.4%**.
- Heer daboolka adeega biyaha magaalooyinku Sanadkan bilowgiisa wuxuu ahaa **45%**, wuxuuna qorshaha S.M 2015 ahaa in la gaadho **49%**. Hadaba waxaana adeeg biyo nadiif ah helay bulsho dhan **64,767** ruux oo u dhiganta **2.88%**. Taasoo ka dhigan in heer daboolka biyaha nadiifta ah ee magaalooyinka 12-ka bilood la gaadhay qiyaas dhan **47.88%**.
- Dhanka miyiga heer daboolka adeega biyaha nadiifta ah sanadka bilowgiisa wuxuu ahaa **37%**. Qorshaha S.M 2015 waxuu ahaa in la gaadho **43.1%**. Hadaba, iyada oo lagu saleynayo qorshaha 12-ka bilood ee waxqabadka waxa adeeg biyo nadiif ah helay bulsho dhan **236,230.00** qof oo ku nool dhulka miyiga, taasoo u dhigan in la gaadhay **41.5%**.
- Hadaba guud ahaan heer daboolka adeega biyaha Sanadka bilowgiisa waxaa adeeg biyo helayay bulsho dhan **2,955,000.00** (Magaalo: **1,012,500.00**, Miyi: **1,942,500.00**). Hadaba iyadoo lagu saleyay waxqabadka **12-ka bilood** ee S.M. 2015 waxaa lagu guulaystay in adeeg biyo la gaadhsiiyo Bulsho Dhan **3,256,017.00** taas oo ka dhigan in adeeg biyo cusub la gaadhsiiyay **301,017** Qof.

Hawlaha Mashaariicaha Natiijada laga gaadhay

- Mashaariicaha biyogelinadda **magaalooyinka** iyo **miyiga**, waxaana sanadkan qorshaysnaa **29** mashruuc, waxaana dhamaaday **7** mashruuc oo kala ah, biyo galinta magaalada wardheer, Gashaamo, Garaslay (Dhuxun), Imay Bari, Aware, Dardheer (Garbo), Haracaday (Deg. Birqod). Halka **19** mashruucana socdaan.
- Dhanka qodaalka ceelasha dhaadheer waxaa S.M. 2015.T.I Xafiiska biyaha iyo bahwadaagtiisa waxaa u qorshaysnaa ceelal dhan **117 Ceel (ceelashaas oo isugu jira kuwii soo wareegay ee 2014, kuwa qorshaysnaa 2015, kuwii Emergency-ka iyo kuwa Bahwadaagta)**. Waxaa qodaalkoodu dhammaaday **54ceel** waxaana socda **18** ceel.
- Mashaariicaha biyo-xidheenadda, (**Haffirdam**) waxaa qorshaysnaa **15** biyo xidheen oo isuga jira kuwa waawayn iyo kuwa yaryar ah. Waxaa dhammaaday **5 biyo xidheen** oo kala ah Biyo Xidheenkada Sardaale, Dhagaxmadaw, Garbo, Daroor iyo Yooqaale. Waxaa socda oo heer fiican maraya **9** Biyo Xidheen.
- Mashaariicaha dhismaha goobaha biyaha laga cabo (**on-spots**) iyo balaadhinta ilo-biyoodyada waxaa qorshaysnaa **73** ilo-biyood. Waxaa qabsoomay **52** mashruuc waxaana socda **15** mashruuc.
- Rakibaada solar-da iyo gelinta laydhka ceelaha biyaha ee ku shaqeyn jiray shidaalka (**Diesel**.) waxaa sanadkan qorshaysnaa **33** mashruuc. Waxaa qabsoomay **21** waxaa socda **12** mashruuc.
- Dayactirka iyo hagaajinta ceelasha oo isugu jira ka hortaga iyo hagaajinta (**preventative and corrective**), ayaa waxaa qorshaaysanaa xafiiska iyo bahwadaagtiisa **245** dayactir ceel. Waxaa qabsoonaty **259** dayactir.
- Noocyada kala duwan ee tababarada tayaynta awooda fulineed ee shaqaalaha sectarka ee kor loogu qaadayo adeegyada biyaha, waxaa ka faa'idaystay la siiya **173** xubnood oo ka kala tirsan heer deegaan, degmo iyo xidhiidhiyaasha Gobolada.

6. Xafiiska Waraabka & H/Dooxoyinka

- Iyada oo laga duulaayo qorshaha dhimista cunta ayaa xafiisku qorshe u qaatay sidii kor loogu qaadi lahaa waxsoosarka dhanka waraabka iyada oo bulshada beeralayda laga faa'iidaynaayo biyaha wabiyada iyo kuwa dhulka hostiisa ku duugan ayaa waxaa

darasaad lagu sameeyay dhul cabirkiisu dhanyahay **18,230Ha**, dhanka kale waxaa kabayaasha waraabka laga dhisay isla markaana laga faa'iidaysta dhulsho dhan **5900 Ha**, iyada oo dayactir lagu sameeyay kabayaasha waraabka oo dhan **2,200Ha**.

- Mashaariicdan waxaa sanadkan laga helay wax soo saar dhan **149,680 kiintaal** oo dalaga noocyadiissa kala duwan ah.

Mashaariicda Xafiisku Fuliya S.M. 2015

- Si guud xafiiska waraabku wuxuu dhamaytiray 100% fulinta **16 mashruuc** oo isugu jira **4 mashruuc** oo ah kuwa horumarinta waraabka, **10 mashaariicda** biyaha nadiifta, dhismaha buundada Dhuxun.
- Mashaariicda biyaha nadiifta iyo fayadhawrka oo kala ah dhismaha Haffir-damka Daroor, dhismaha Haffir-damka Yooqaale, Biyo-galinta Hiiley, Dhismaha kaabayaasha ceelka Dhogar-jir (**On-spot**), qodaalka ceelasha Harta-sheekha, Xidh-yar, Tukaale, Tuulo-Cawl, Qoriile, iyo Miirdoog.
- Marka la fiiriyo mashaariicda sida fiican usocda waa **25 mashruuc** oo isugu jira **5 mashaariicda** kaabayaasha waraabka oo akla ah Dollow Cado, Harawo, Yaxoob, Jarati, Guradhaamole celcelis ahaana maraya **75%**, waxaa sidoo kale socda **12 mashaariicda** biyaha-nadiifta oo kala ah biyagalinta hartashekh, Mooyaale, Bayaxaw , Qaraf iyo Celweyne havier dam oo celcelis ahaan maraaya **65%**, iyo qodaalka ceelasha sida Tukale two, Qudhacweyne iyo Qaraf **2 mashruuc** ee daad-leexin guradhamole iyo Shaygoosh oo celcelis ahaan kala maraayaa **91% ilaa 14%**, halka xafiisku gacanta ku hayo mashariicda wadooyinka kala ah wadada Casbuli-Badhiwayn, wadada dhobawayn-qalafo iyo wadada Garawa-gunagado oo dharkoodu dhanyahay **211KM** iyo Qodaalka 5 ceel oo sample ah ee mashruuca bulhan bulaale oo soo saarahayo 19l/sec ceelkiiba.
- Sidoo kale waxaa uu xafiiska waraabku bilaabay mashariic tiradoodu dhantahay **12 mashruuc** oo dhamaantoodba khuseeya dhismaha kaabayaasha waraabka kuwaas oo qorshaha S.M 2015 ku jiray, dhamaana heshiskooda la galay isla markaana lagu jiro daabulida qalabka dhismahooda. Waxayna kala yihiin Mashriicda Waraabka ee Baaley, Sadey, Hardiin, Waangay, Sagag, Suuf (imay Galbeed), Feerfeer, Faafan (Hara-hawd), Xaarey, iyo Hudhet, iyo Maraacaato, Halka mashaariicda cusub ee biyaha nadiifta

kayihiin **2 mashruuc** oo kala ah; mashruuca dhismaha biyo-xidheenka yare ee Higlooley iyo mashruuca fidinta iyo dayactirka biyo-galinta Sanxaskule

7. Xafiiska Beeraha

Tiirka 1^{aad}: Dhanka Horumarinta WaXsoosaarka & Tayada Beeraha

- Waxaa qorshaysnaa in dhul-beereedka falashada laga qaado **480,077 Ha** lana gaadhsiiyo **847,606 Ha**; balse waxaa qabsoomay **770,832 Ha**. Taas oo ka dhigan in **90.9%**
- Waxaa qorshaysnaa in xadiga waxsoosaarka laga qaado **11,585,894 Qts** lana gaadhsiiyo **28,853,874 Qts**, balse waxaa la gaadhay **23,243,107 Qt**. Taas oo ka dhigan **80.55%**
- Waxaa qorshaysnaa in la qaybiyo abuurka xulka ah **45,000 Qt** oo firilay ah iyo **15,000 Kg** oo khudaar ah. Waxaase la qaybiyey abuur xul ah oo gaadhaya **45,650Qt** oo ah firilayda kala duwan iyo khudaar ah.
- Waxaa qorshaysnayd in la qaybiyo bacrinta **86,000Qt**. Waxaa la qaybiyey **74,977Qt** (57,800 daladaha gashiyada ayaa iibiyay, inta kalena xafiiska beeraha ayaa qaybiyay) oo bacrinta carada ah (fertilizers). Waxaa fulay **87.18%**
- Waxaa qorshaysnaa in la biqliyo lana qaybiyo **52,022** abqaalka geed-midhoodka. Waxaana la qaybiyay **54,112 Abqaal (104%)** oo isugu jira Geed midhoodka la isku talaalo.
- Si looga falceliyo barmaamijka kordhinta waxsoosaarka qamadiga gobolada Shabele, Sitti, Afdheer iyo Libaan, waxaa qorshaysnaa in la beero **18,760 Ha** oo qamadi ah, balse waxaa lagu guulaystay in la beero **10,940 Ha** oo qamadi ah iyo **100 Ha** oo qudaar ah laga beeray.
- Si kor loogu qaado tayada waxsoosaarka firileyda lana dhimo lunka ku luma dhibaataada cudurada iyo cayayaanka waxaa qorshaysnaa dhimista lunka hoos looga dhigo **26%**, lana gaadhsiiyo **24%**. Waxaana lagu guulaystay in lagaadhsiiyo **25%** (kadib markii la qabtay sahanka cudurada, sunta iyo haamaha buufinta oo la qaybiyay iyo tababaro la bixiyay)

- Waxaa qorshaysnaa in la daraasadeeyo cudurada iyo Cayayanada gobolada Shabeele iyo Siti. Waxaa qabsoontay in darasaad lagu sameeyey cudurada iyo cayayaanada saameeya beeraha degmooyinka **Goday iyo Erer**.
- Waxaa buufin iyo wacyigalan lagu sameeyey cudurka cadhada ee liinta ku dhaca dagamada Erer **2,800** ha.
- Waxaa wacyigalin iyo tababar la siiyey **163** xoolodhaqato beeraley iyo khabiirada beeraha dagmooyinka furimaha ayaxu ka soo galo deegaanka.
- Waxaa Qorshaysnaa in laqaybiyo cagafyada daynta ah ee kasoo wareegay sanadkii 2014 oo dhanaa **60 cagaf** oo noocadu yahay **SWT 90Hp**. Waxaa kale oo qorshaysnaa in lasoo gado **40 cagaf** oo kuwa beeraha lagu qodo, iyo **3 cagaf** oo kuwa qamadiga lagu gooyo. Waxaa lagu guulaystay in lasoo iibiyo **60 cagaf** oo kuwa beeraha lagu qodo ah, sidoo kale, waxaa la qaybiyay **60cagaf**, waxaa sidoo kale warbixinta degmooyinka ka muuqatay in **212 cagaf** ay soo gashadeen deegaanka beeralaydu. Taas oo ka dhigaysa wadarta guud ee cagafta beeralaydu heshay **392 cagaf**.
- Waxaa qorshaysnaa in **3 iskaashato** oo keena qalabka dayactirka qalabka beeraha (spare parts) laga dhiso saddex global. Waxaa lagu guulaystay in **1 iskaashato** hawlgasho oo ka ganacsato sparepartska cagafyada.
- Waxaa qorshaysanayd in tirada ka faa`idaystayaasha isticmaalka qalabka beeraha la gaadhsiiyo **294,627 Beeralay**. Waxaa qabsoontay in lagaadhsiiyo ka faa`idaystayaasha isticmaalka qalabka beeraha **210,000 Beeralay**
- Waxaa markii ugu horaysay deegaanka laga dhisayaa xarunta dayactirka qalabka beeraha (**Agricultural mechanization center**)

Tiirka 2^{aad}: Dhanka Horumarinta Suuqgaynta & Kaabayaasha Beeraha

- Waxaa qorshaysnaa dhamaystirka dhismaha bakhaardda kaydka ee laga fulinayay degmooyinka, Hudheet, Tuli iyo Imay-Bari. Waxayna dhismayaashooda kala marayaan bakhaarada kaydka waxsoosaarka degmooyinka Iimay bari(**100%**), Hudet(**95%**),

Tulliguuleed(60%) &Dolo-Bay(85%), saylada khudaarta godey iyo Saylada Khudaarta Harawo oo la dhamaystiray 100%

- Waxaa qorshaysnaa in Beeralayda gobolka Faafan ee ku hawlan waxsoosaarka qamadiga laga iibsado waxsoosaarkooda si loo dhiirigaliyo. Waxaa laga iibsaday beeralayda ku hawlan waxsoosaarka qamadiga degmooyinka Tuli,Harorays iyo Awbare 13,236 Qt.
- Waxaa qorshaysnaa in la dhiso daladaha iskaashatooyinka ku hawlan waxsoosaarka beeraha. Waxaa qabsoomay in laga dhiso 13 daladood gobolada Fafan, shabele, Afdher, Jarar, Siti, Erer, Korehay, Liban and Dawa. Sidoo kale, dalada iskaashatooyinkan oo isla sanadkan hawlgalay waxay gaadhsiiyeen beeralayda 57,950 Qt oo bacrin ah laguna gaadhsiiyay qiimo jaban.

Tiirka 3^{aad}: Dhanka Isticmaalka & Ka-Faa'iidaydiga Khayraadka Dabiiciga Ah

- Waxaa qorsheysnaa in S.M-2015 dib loo soo nooleeyo dhul dhan 43,603 hiktar ah oo waraaro iyo carro-guur waxyeelayeen, balse waxaa lagu guuleystay in lasoo nooleeyo dhul-beereed iyo dhul daaqsimeed dhan 35,967.5 (82.4) hiktar. iyadoo la isticmaalayo farsamooyinka ilaalinta carada iyo biyaha oo kala duwan.
- Waxaa qorshaysnaa in la sameeyo 23 biyo baahiye, waxaana qabsoomey 23 biyo baahiye. Waxaa sidoo kale dayactir iyo kobcin lagu sameeyey 5 biyo baahiye oo hore loo hirgaliyey waxayna biyo baahiyeyaashani dib usoo nooleeyeen dhul dhan 840 hiktar. waxaana shaqo abuur ku meel gaadh ah ka helay 644 qof wakhtigii dhismuhu socday. Waxaa dhulka la dayctiray ka faa'iidaystay 336 qoys.
- Waxaa qorshaysnaa in degmooyinka barnaamijka shabakada Badbaada waxsoosaarka qaybtiisa ka faaiidaystayaasha xooga shacabka ay fuliyaan shaqooyinka xooga shacabka lagu fuliyo ee xidhxidhka dhulka iyo dib usoo noolaynta dhulka nabaad guurka iyo waraaradu saameeyeen oo dhan 33,927.50 hiktar. Waxaana lagu guulaystay fulinta shaqooyinka xooga shacabka lagu fuliyo ee xidhxidhka dhulka iyo dib usoo noolaynta dhulka nabaad guurka iyo waraaradu saameeyeen taas oo lagu dayactitay dhul dhan 33,927.50 hiktar lagana fuliyey dhammaan degmooyinka Barnaamijku ka hawl galo.

- Waxaa qorshaysnaa in la aas-aaso **3 xarumood** oo waxsoosaarka geedaha abaqaalaka ah oo laga qaado **147 xarumood** lana gaadhsiiyo **150 xarumood**. Waxaa lagu guulaystay in la aas-aaso **3 xarumood** oo cusub oo dhirta lagu biqliyo oo laga kala sameeyey degmooyinka Daratoole, Guradhamole iyo Qarsadhule kuwaas oo ka dhigay **150 tirada xarumaha** dhirta lagu biqliyo ee deegaanka.
- Waxaa qorshaysnayd in la sameeyo qorshaha dhir beerista deegaanka **S.M 2015 T.I** oo dhan **8,100,000** oo loo sii kala jajabiyo gobol iyo degmo. Waxaa la sameeyey qorshihii oo u kala jajabsan gobol iyo degmo waxaana lala wadaagay dhammaan gobolada si ay ugu sii gudbiyaan degmooyinka. Waxaana la soo saaray dhir dhan **3,113,095** (38.4%), waxaa la beeray/la qaybiyey dhir dhan **2,449,074** oo isugu jiray geedmidhood, Geedhadheed iyo geedaha qurxinta oo laga beeray degmooyinka iyo maamul magaalooyinka. Waxaa intaa dheer magaalada **Hargaysa** iyo **Jabuuti** oon ugu deeqnay dhir isugu jirta geed midhood iyo geedaha qurxinta oo dhan **6,650**.
- Waxaa Qorsheysnaa in tirada Dhulbeereedka Waraabka joogiisu hooseeyo ku baxa laga qaado **20,504.5 Ha** lana gaadhsiiyo **23,500 Ha** SM 2015 T.I Waxaa la gaadhsiiyay dhulbeeraad dhan **22,994.5 Ha** lagu fidiyay in waraabka beeraha lagu fasho.
- Waxaa qorsheysnaa in xadhiga lagajaro dhismayaashakanaaalada waraabka ee Beercaano, Qalafo iyo Cadaadle. Waxaa qabsoomay in lagu wareejiyo **1,372 qoys** Dhismayaasha **3 kanaal** degmooyinka Beercaano, Qalafo & Cadaadle oo waraabinaya Dhulbeereed dhan **343 Ha**, oo ay Ka faa'iidaystaan beeraleeydhan **1,372 qoys**
- Waxaa qorshaysnaa in laga bilaabo dhismaha kanaalo cusub oo laga dhisayo degmooyinka kala ah Hudhat, Ilmey Bari, Ceelkari, Hargeele, Qarsadulla, Mustaxil iyo Abaqorow, kanaaladaas oo maraya **5%-45%** kuwaas oo markay dhamaadaan waraabin kara dhulbeereed dhan **497 Ha Kana** faa'iideysanayaan beeralay dhan **1,210 qoys**.
- Waxaa qorsheysnaa in laqeeybiyo matoorada waraabka beeraha oo tiradoodu dhantahay **315 xabo** oo loo qaybinayo **38 Degmo**. Waxaa **38 Degmo** lagaadhsiiyay Matoorada Waraabka oo tiradoodu dhantahay **315 Xabo**, kuwaas oo waraabinaya Dhulbeereed dhan **497 Ha** oo ay ka faa'iideysanayaan **1,210 Qoys**.

- Waxaa qorshaysnaa in lagu samaynayo daraasdaka dhismayaasha waraabka joogiisu hooseeyo lagaqaado **30 daraasaad** lanagaadhsiiyo **45 daraasaad** SM 2015 TI. Waxaa la gaadhsiiyay **46 daraasaad (16 daraasad ayaa qabsoomay)** oo waraabka joogiisu hooseeyo ku haboon ee gobolada **Shabeele, Afdheer iyo Siti.**
- Waxaaqorsheysnaa in Lasoo xusho goobaha kuhaboon dhismayaasha waraabka yar yar **11 Degmo.** Waxaa lasoo xushay **11 Goobood** oo kuhaboon dhismayaasha waraabka joogiisu hooseeyo **11 Degmo** oo kala ah **Danbal Shinille, Gotabiki, Goljano Wangay, Laghida, Raaso, limey Galbeed Qarsadulla, Mustaxile iyo limey bari**
- Waxaa qorsheysnaa in Nashqadeeyn iyo Dukumanti dhameystiran loosameeyo **6 goobood,** oo kamid ah kuwii Lasoo xushay. Waxaa **100% Hirgalay** Diyaarinta dhukumentiyada Nashqadaynta **6 Goobood** ooku kalayaala degmooyinka kala ah Qarsadulla, Mustaxil, Abaqorow, limeygalbeed, Raaso iyo Goljano.

Tiirka 4^{aad}: Dhanka Xaqiijinta Damaanada Cuntada & Maaraynta Khataraha

- Waxaa qorshaysnaa in macaamisha degmooyinka uu ka hawl galo barmaamijka PSNP5 oo dhan 93 dagmo loo qaybiyo lacag dhan **4,009,238,880.00 Birr** ee bilaha July ,2022 ilaa June,2023 waxaana la fuliyay in macaamisha degmooyinka uu ka hawl galo barnamijka PSNP5 oo dhan **93 dagmo** lehna macaamiil dhan **1,627,132 ruux** loo qaybiyey **4,009,238,880.00 Birr** ee bilaha July,2022 ilaa May,2023 **(100%).**
- Waxaa qorshaysnaa in degmooyinka cusub ee barnamijka PSNP lagu shaqaalaysiiyo xirfadlayaal cusub oo dhan **188 xirfadle 47degmo.** Waxaa dagmooyinka cusub ee barnamijka **PSNP** lagu shaqaalaysiiyay **184 xirfadle** oo isugu jiray shaqadan ayaa **97.8%.**

Tiirka 5^{aad}: Dhanka Kobcinta Awooda & Garaadka ee Waxsoosaarka Beeraha

- Waxaa qorsheysnaa in la kobciyo awooda Shaqaalaha waaxda khayraadka ee heer deegaan, Madax Xafiiseedyada Beeraha degmooyinka, Khabiirada Khayraadka dabiiciga, Xirfadlayaasha beeraha **(DA),** Shaqaalaha barmaamijka **PSNP** eeTA-yada iyo khabiirada kale ee Beeraha ee heer degmo oo dhan**514.**Waxaa qabsoomay in la tababaro Shaqaalaha waaxda khayraadka ee heer deegaan, Madax Xafiiseedyada Beeraha degmooyinka, Khabiirada Khayraadka dabiiciga, Xirfadlayaasha beeraha **(DA),** Shaqaalaha barmaamijka PSNP eeTA-yada iyo khabiirada kale ee Beeraha ee heer

degmo oo dhan **514 (100%)** laguna tababaray habka loo sameeyo nashqada biyo baahiyeaasha, xidhmooyinka yaraynta saamaynta cimilada, habka dabagalka shaqooyinka socda, Maamulka goobaha dhirta lagu biqliyo, Qorshaynta, habka diyaarinta warbixinta, maaraynta bulshada iyo Bay,ada, Ilaalinta Carada iyo Biyaha iyo maaraynta dhul daaqsimeedka.

- Waxaa qorshaynaa in tababaro la siiyo **600** xirfadle oo isugu jira shaqaalaha **cusub** ee barmaamijka **PSNP**, xirfadlayaasha fidinta beeraha (**DA**), darawalada mashiinada beeraha(**operators**), iyo beeralay. Tababarkaas oo isugu heer deegaan iyo heer degmo. Waxaa qabsoontay in tababaro kala duwan la siiyay **594** xirfadle. Taas oo qabsoontay **99%**
- Waxaa la tababarey **70** khabiirada beeraha ah oo lagu tababarey xaruunta cilmibaadhista ee Melkasa habka beerashada khudaarta iyi geedmidhoodka.

8. Xafiiska Horumarinta Xoolo-dhaqatada

- Waxaa la dhamaystiray islamarkaana adeega bixinaya dhismaha kiliniga xoolaha Wardheer.
- Dhismaha Shaybaadhka xoolaha ee Qabridahar ayaa **100%** la dhamaystiray.
- Waxaa la fuliyey ololaha talaalka xoolaha nooca looyaqaan list **A-ga** ee xuduudaha iskaga gudba lana talaalay xoolo dhan **14,803,018 neef** oo iskugu jira afarta meesi ee xoolaha waxaana laga fuuliyey dhamanba **11-ka Gobol**.
- Waxaa gobolada deegaanka laga fuliyay daawaynta xoolaha waxaana la daweeeyey xoolo dhan **9,976,000 neef** oo iskugu jira afarta meesi ee xoolaha.
- **Waxaa lagu tababaray 100** xirfadlayaasha Caafimaadka xoolaha ah habka soo gudbinta xogta cudurada xoolaha ee **ADNIS** iyo **DOVAR**.
- Waxay cuduro ka dilaaceen **70 degmo**, waxaana baadhitaan lagu sameeyey **61** degmo oo ka mida (**88%**). Cudurada laga helay waxaa kamid ah kaligii cune (**PPR**), sanabka riyaha (**CCPP**), furuqa adhiga (**sheep & goat pox**) IWM.
- Waxaa la dhamaystiray dayactirka shaybaadhka xoolaha ee magaalada jigjiga.

- Si kor loogu adeeg bixinta caafimaadka degmooyinka xoolo-dhaqatada iayadoo lalakaashanayo bahwadaagta waxaa latabaray **600** xubnood oo daryeelayaasha caafimaadka xoolaha isuguna jira kuwo cusub & qaar sii jiiray.
- **51**degmo ayaa laga fuliyey baadhida cudurada dilaacay halka **45** ka mida laga jawaab ceeliyey lagana talaalay.
- Si loo yareeyo saamaynta abaaraha wuxuu xafiisku beeray **800 ha** oo calafka tayaysan ah, sidoo kale **530 ha** oo uu bah-wadaagtu beertay, halka **1,930** kaqaygalka bulshada iyo bahwadaagta lagu beeray waxaana ilaa hadda soo go'day **612,850** xidhmood qaybtii ugu horaysay ah halka inta dhiman ifilayo inay kasoo go'do calaf dhan **528,150**.
- Xafiisku wuxuu soo iibiyay **116,000** xidhmood oo calafka xoolaha ah kaas oo loogu talo galay in lagaga jawaabo xaaladaha deg-deg ah ee abaaraha waxaana laqaybiyey **78,000** xidhmood.
- **1,628** kiintaal oo isugu jirta noocyada kala gadisan ee abuurka tayaysan ee calafaka xoolaha ayaa lasoo iibiyey Lana qaybiyey.
- Waxaa **100%** maraya dhismaha bakhaarka calafka xoolaha ee degmada Doolo-Cado.
- Waxaa **100%** maray iibka mashiinada calafka xoolaha lagu xidh-xidho iyo halka kuwa lagu gooyo calafka marayo **90%**.
- Si kor-loogu-qaado dhaqashada Shinida waxaa **324** xubnood oo ka kala socda Iskashatooyinka ku hawlan dhaqashada Shinida la siiyey tababarka habka dhaqashada casriga ah ee Shinida.
- **348** xubnood oo ka kala socda iskashatooyinka degmmoyinka Q/bayax, Dh/buur, Cadaadle iyo ismaamul magaaloooyinka Q/bayax iyo Dh/buur ayaa lagu tababaray habka casriga ah ee dhaqashada digaaga iyo maarayntiisa.
- Si kor-loogu-qaado fahanka bah-wadaagta dhanka siyaasada iyo Istiraatiijiyada horumarinta xoolo-dhaqatada, wuxuu xafiisku magaalada Jigjiga ku qabtay kulan-wayne ay kasoo qayb-galeen **120** xubnood oo ka kala socday gobolada, degmooyinka iyo shaqaalaha xafiiska.
- Waxaa ladhamaystira qabyo qoraalka siyaasada iyo istiraatiijiyada horumarinta xoolo-dhaqatada degaanka iyo qabashada fagaareyaal lagu turxaan bixinayo qabyo qoraalka.

- Waxaa heer deegaan iyo heer gobolba lagu daah-furay barnaamijka **Dhaqo oo Dheefso** oo loogu talo-galay in kor-loogu-qaado wax-soo-saarka Caanaha, Digaaga iyo Malabka.
- Si loo dar-dargaliyo barnaamijka(**yelema tirufat**) dhaqo oo dheefso, Waxaan iskaashatooyinka Digaaga ee afar gobol ka jira uqaybinay **2,500** oo Digaaga casriga ah, qalabkiisa iyo labo biloodcuntadiisa ah iyo sidoo kale qaboojiyaasha cadceeda ku shaqeeya oo **2** xabo ah oo la siiyay iskaashatooyinka ka jira maamulka magaalada Godey.
- Waxaa la diyaariyay qorshaha iyo qoondada wax-soosaarka **Caanaha, Digaaga iyo malabka** ee gobolada iyo degmooyinka uu deegaanku ka kooban yahay.
- Waxaa la qabtay shirka wadatashiga barnaamijka Dhaqo oo dheefso ee ha'ayadaha deegaanka ka shaqeeya.
- Waxaa la gaadhsiiyay tirada xarumaha laga baahiyo xogta suuqa lagaadhsiiyey **47**xarumood halka markii hore ay ahaayeen **26** xarumood sanadkii 2014.
- Waxaa laga shaqaysiiyey lagana aasaasay guddiyada maamulka suuqa xoolaha **14**Sayladdood taas oo tirada guud sayladaha adeega-bixiya ka dhigaysa **47** sayladdood halka sanadkii 2014 ka ahaa **33** sayladdood.
- Si loo dar-dargaliyo hawlaha dhamaystirka dhismaha **Maxjarka Camadhle** lagu sameeyay qiimayn farsamo iyadoo loo xil saaray xubno Injineero ah ku waasoo soo gudbiyay daraasad dhamaystiran oo ku saabsan waxa farsamo ahaan ka dhiman Maxjarka, waxaana hawshan masuuliyadeeda si buuxda ula wareegay Wasaaradda Beeraah ee Federaalka.

9. Xafiiska Waxbarashada

- Waxaa qorshaysanayd in lasoo xareeyo arday tiradoodu dhan tahay **1,439,741**. Hase-yeeshee waxaa lasoo xareeyay ardayd dhan **1,282,670** oo ka dhigan **89%** qorshaha la fuliyay. Ardaydaas **53%** waa lab, halka dhadiguna yahay **47%**. Soo xaraynta ardayda ayaa waxaa saameeyay abaaraha soo noqnoqda ee ka jira deegaanka, taas oo hoos udhigtay xaddiga ka qayb-galka ardayda deegaanka.

- Waxaa la hawl-galiyay kulliyadaha waxbarashada barayaasha ee Dr/C/majid, Q/dahar iyo Dolo-Cado oo ay wax kabartaan arday ay tiradoodu tahay **2,112**
- Waxaa Dib-loo furay Dugsiyada iyo xarumaha Waxbarashada oo ay tiradoodu dhan tahay **4,573**, iyo Xarumaha waxbarashada dadka waawayn oo ay tiradoodu dhan tahay **1,080** xarumood oo ay ka faa-iidaystaan arday dhan 56,03 arday
- Waxaa Dhammaan dugsiyada iyo Xarumaha Waxbarashada deegaanka loo shubay miisaaniyada deeqada waxbarashada(Schoolgrant) oo culays dhan **82,264,291** , Miisaaniyadaas ayaa waxay ka qayb-qadataa horumarinta kaabayaasha waxbarashada dugsiyada deegaanka, dhanka kalle Waxaa **28** Dagmo ee uu ka hawl-galo mashruuca Horumarinta Sab-wanaaga iyo ilo-biyoodka(OWNPII) one wash, Loo shubay Miisaaniyad culays dhan **33,394,960** Malyan oo loo qorsheeyay biyo-galinta iyo dhismayaasha Musqulaha dugsiyada, oo kaqaybqaadanaysa horumarinta Sabo-wanaaga iyo caafimaadka ardayda dugsiyada dagmooyinka.
- Waxaa dib loo furay xarumaha waxbarashada ardayda baahida gaarka ah oo dhan **42** xarumood. Waxaa la aas-aasay xarumaha Waxbarashada isku-dhafka ah oo ay tiradoodu dhan tahay **19** xarumood oo cusub. Guud ahaan waxaa **61** xarumood wax ka barta ardayda baahida gaarka ah oo ay tidaoodu dhan tahay 4,504 arday,
- Waxaa La hawl-galiyay barayaasha iyo hogaaminta Waxbarashada oo ay tiradoodu dhan tahay dhan **23,971**. Barayaasha deegaankeenna illaa **85%** heerkooda aqoonta waa Diploma iyo wax ka hooseeya, heerka Degree waa **15%**, heerka Master waa **0.3%**.
- Waxaa La shaqaalaysiiyay barayaal dhan **1,096** oo iskugu jira barayaasha degreega, Baryaasha diploma iyo baryaasha waxbarashada dadka waawayn oo ah heerka TTI.
- Waxaa tababarada dhaadheer la siiyay barayaal dhan **122** oo lagu xareeyay jaamacada Jigjiga. Barayaasha oo kala **69** bare oo dhigta heerka Masterka, halka **53** bare ay dhigtaan heerka Degreega koobaad. Barayaashaas waxay dhigtaan maadooyinka xisaab, fiisikis, kimistiri, bayoloji, xisaab iyo ingiriis.
- Waxaa kor loo qaaday heerka aqoonta barayaasha heerka Diploma ahoo ay tiradoodu dhan tahay **400** oo bare, iyaga oo heerkooda aqooneed la gaadh-siiyay heerka Degreega koobaad

- Dhanka kalle Waxaa tababarada gaagaagan la siiyay **1453** bare, tababaradaas oo kala ah habka baris-barashada maadooyinka sayniska ah baris-barashada afafka (**af-somali iyo Ingiriis**), barnamijka horumarinta xirfada joogtada ah ee baryaasha iyo hogaaminta Waxbarashada.
- Waxaa si buuxda loo hirgaliyay Manhajka cusub ee dugsiyada hoose-dhexe (fasalka **1aad-8aad**) iyada oo Manhajka cusub lagu tababaray barayaal iyo hogaaminta Waxbarashada heerarka kala duwan ee oo ay tiradoodu dhan tahay 2,196.
- Waxaa Laqaybiyay Manhajka dugsiyada hoose iyo dugsiyada dhexe oo ay tiradoodu dhan tahay 162,300 buug oo lagu sii bilaabay dugsiyada sannad-dugsiyeedka 2015, dhanka kalle waxaa laasoo daabacay oo lasoo xareeyay buugaag dhan **710,310** buugaagta manhajka ah waxaana la gaadh-siin doonaa dhammaan dugsiyada hoose-dhexe ee deegaanka Bishan gudaheeda,
- Waxaa lasoo saaray Natijada imtixaanka fasalka 8aadka oo ay qaateen arday dhan **44,736** oo ay ka gudbeen arday dhan **39,736(89%)**. Halka Wasaaradda Waxbarashada ay shaacisay natijada Imtixaanka fasalka 12aadka oo ay deegaankeenna imtixaanka qaateen **24,384** arday. Natijada **50%** wax ka sareeya waxaa keenay **165** oo u dhiganta **0.7%**.
- Dhanka kalle waxaa imtixaanka fasalka 8aadka ufadhiisnaya arday dhan **40,075** arday, halka sidoo kale ay imtixaanka heer qaran ufadhiisanayaan arday dhan **23,683**, Si kor loogu qaado heerka aqoonta iyo fahanka ardayda ayaa waxaa barnamijka kabista heerka aqoonta ardayda oo socday mudo 3 bilood ah looga faa-iideeyay **4,870** oo ah ardayda qaadanaysa imtixaanka fasalka 12aadka sannad dugsiyeedka 2015, ardaydaas ayaa laga soo kala xulay dugsiyada sare ee ugu ardayda badan deegaanka, barnamijka kabista ayaa ah barnaamij ay gashi aqooneed ka heleen ardayda xarumaha loo qorsheeyay, Waxaa Naqtiin udiyaaragaraw(**Remdial clasess**) ka faa-iidaystay ardayda ka hooseeyay natijada imtixaanka fasalka 12aadka SM2014, ardaydaas oo dhan **2,400** oo arday si ay uhelaan fursad ay ku keenaan natijada imtixaanka .
- Waxaa la sameeyay tira-koobka xogta waxbarashada 10ka gobol ee kala ah Faafan, Jarar, Shabeelle, Liibaan, Daawa, Af-dheer, Qoraxee, Doollo, Erer, Noggob, Waxaa

tirakoobki laga sameeyay **3,743** dugsii oo lagu ogaaday inay xidhan yihiin **879 (23%)** dugsii, halka **2,864** dugsii ay furan yihiin (**77%**). Wadarta ardayda iska diiwaan-galisay dugsiyada 10-ka gobol ayaa waxay ahayd **1,159,870** balse waxaa dugsiyada loogu tagay arday dhan **444,796 (38%)**. Dhinaca kale waxaa ku shaqaalaysan barayaal dhan **21,706** hase-yeeshee waxaa goobta shaqada loogu tagay baraal dhan **18,065 (83%)**, halka barayaasha aan goobta shaqada loogu tagin ay yihiin **3,642 (17%)**

- Waxaa la qiimeeyay heerka tayada dugsiyada kala duwan ee deegaanka, dugsiyadaas oo dhan **1424**, iyada oo ay **89%** oo kamaid ah dugsiyada la qiimeeyay ay ka hooseeyaan heerka adeeg-bixinta tayada dugsiyada, Waxaa kalle oo la shaaciyay Natijada imtixaanka xaqiijinta heerka aqoonta barayaasha iyo hogaaminta waxbarashada oo dhan **2,208**, waxaana ka gudbay baraal iyo hogaamin dhan **242 (11%)**.
- Dhanka Mashaariicda Waxaa La dhamaystiray **8** mashruuc oo kala kala Dugsiga hooyga Afdam, Madashada shirka Kuliyada Dolo-cado, Madasha War-laliska Xafiiska Waxbarashada (TV) Dayrarka xafiiska Waxbarashada heer deegaan, halka sidoo kalle si buuxda loo shaqo-galiyay dugsiyada dhamaaday dabayaaqadii SM2014 Dugsiyada sare oo kala ah Godgod, Kudunbuur iyo hadhagaalle iyada oo sidoo kalle la dhamsytiray dayac-tirada dugsiyada Birqod, Feerfeer iyo Bilcilbuur, Dugsiga sare e Iftiin ee Mamaulka magaalada Jigjiga, halka ay sidoo kalle gabagabo marayaan mashaariicd dugsiyayada hooyga waxbarashada Gunagado, Filtu, Sheed-dheer, Dh/wayn, Qalaafe, Ley iyo Mirqaan iyo dugsiga sare ee Qoleji, Guud ahaan Waxay mashaariicdu maraysaa inta udhaxaysa **83%-98%**
- Waxaa si buuxda loo bilaabayaa dhismayaasha **4** dugsiyada sare oo cusub Yooqaale, Mamaulka Magaalada Q/dahar, Ayshaca iyo Baabili, dugsiyadaas oo ay inaga taageertay Haayada Miscehen for Mischen, halka sidoo kalle ay bilaw yihiin dayac-tirada dugsiga sare hooyga Wardheer, Maamulka magaalada Godey, Maamulka magaalada jigjiga, Erer iyo Hargeelle iyo Wajaalle
- Waxaa la qalabeeyay Dugsiyada sare ee kala ah Lagahida, Qubi, Hadhagala, Kudunbuur & Lehel Yucub, qalabaynta dugsiyada ayaa waxaa ka faa-iidaystay ardayda dugsiyada saree e dagmooyinkaas

- Dhanka Hirgalinta Hirgalinta aaladaha Isbadalka (**Reform Package**)- Xafiisku waxa uu mudnaan gooni ah siiyay hirgalinta aaladaha isbadalka (**Reform Packages**) iyada oo dib u eegis lagu sameeyay barnaamijka ‘**Balanced Score Card**, qorshayaashii xafiiska, qorshaha guud ee xafiiska & qorshe sanadeedka 2015, Waxaa Iyana Xafiisku qiimayn shakhsi ku sameeyay dhamaan agaasimeyeyaasha xafiiska. Hirgalinta aaladaha isbadalka & qiimaynta shaqo ee waaxaha waxa ay Xafiisku u sahlidoontaa ka midho dhalinta qorshayaasha xafiiska, dhanka iyada oo laga duulayo xoojinta shaqooyinka xafiiska iyo horumarinta tayada adeeg-bixinta ayaa waxaa heshiis shaqo ay kala saxiixdeen hogaaminta xafiiska iyo agaasimayaasha heshiiskaas oo ku aaddana xoojinta tayad shaqo-dhaadhicinta shaqo, heshiiskaas ayaa loo qorsheeyay in lagu qiimeeyo kalkasta, bilkasta iyo todobaadkasta.
- Dhanka Kobcinta awooda fulineed ee barayaasha, hogaaminta waxbarashada dugsiyada, khabiirada waxbarashada oo ay ku jiraan dugsiyada meelaha qaxootiyada leh ee deegaanka waxaa tababarada Gaagaaban ee kor loogu qaadayo barnaamijyada Horumarinta iyo xaqiijinta tayada Waxbaarshada lagu tababaray hogaaminta, Khabiirada, Maamulayaasha, kormeerayaasha waxbarashada oo ay tiradoodu dhan tahay 6,987, kuwaas oo laga soo kala xulay qaab-dhismeedyada kala duwan ee waxbarashada heer-deegaan, heer gobol, heer dagmo, heer maamul-magaalo iyo heer dugsi, tababaraadaas ayaa kaliaan-mugleh ka qaadatay horumarinta adeegga tayada adeegga waxbarashada dugsiyada.
- Dhanka kale waxaa la xoojiyay qiimaynta, dabagalka, abaabulka, wacyi-galinta, kormeerka, darasaadka iyo ukuurgalada
- Waxaa kalle oo deegaanka laga dhisay golaha latalinta waxbarashada deegaanka oo ka kooban **11** xubnood,
- Si kor loogu qaado heerka dhiirigalinta barayaasha, ardayda iyo hogaaminta waxbarashada waxaa la dhiirigaliyay ardayda ugu dhibcaha saraysay imtixaanka fasalka 12aadka iyo 8aadka ee sannad-dugsiyeedka 2014 ardaydaas oo dhan **11** xubnood, halka sidoo kalle Abaal-marin la siiyay barayaasha ugu dadaalka iyo shaqo-gudashada badan **11** dagmooyinka **11** gobol

- Si kor loogu qaado heerka fahanka ardayda gabdhaha ah ee heerarka kala duwan ee dugsiyada deegaanka ayaa waxaa xiisado dheeri ah looga faa-iideeyay arday dhan **3,500** arday oo lag xulay dugsiyada dhexe iyo dugsiyada saree e dagmooyinka iyo mamaul-magaalooyinka ,halka sidoo kalle Aggabka nadaafada lagu taageeray gabdhaha qaan-gaadhka ah ee ardayda dugsiyada sare gabdhahaas oo tiro ahaan dhan **2,700** arday, barnamijiyada kor-uqaadida dhiirigalinta,abaal-arinta ayaa waxay si fiican uga qaybqaadatay heerka kaqaybgalka gabdhaha ee dhanka waxbarashada dugsiyada deegaanka.

10.Xafiiska Caafimaadka

- Waxaa dhamaatay **100% 22** mashruuc oo ah dhismayaasha cubsitalada iyo xarumaha. kuwaas oo kala ah **2** cusbitaal, **11** xarumo caafimaad, **3** kayd dhiig (**wardheer, biki iyo gaashaamo**), 6 dhismayaasha qaliinada. Dhinaca kale waxaa dhamaday **12** biyo galin iyo **1** dhismaha jiilka labaad ee loo yaqan second generation HP, Halka ay inka badan **20** mashruuc uu heerka dhismahoodu u dhexeeyo **30-96%**.
- Waxaa si buuxda loo hawlgaliyay **25** mashruuc taas oo la gaadhsiiyay qalabka caafimaadka oo dhamaystiran. waxaana kamida **15** xarumo caafimaad, **10** goob qaliin, iyo **2** cusbital Taas oo dhamaan loo dhamaystiray shaqaalaha kala duwan, iyo qalabayntoodaba.
- Sidoo kale waxaa qalabo muhiim sida kuwa shaybaadka, & bukan jiiifka, qaybta hooyada&dhalaanka agabkaas dhiganta **27milyan** oo birr la gaadhsiiyay **17** cusbitaal, **55** xarumo caafimaad. - Hadaba Mashaariicda cusub la hawlgaliyay ayaa si toosa waxaa uga faa'idaysan doona bulsho ka badan **610**kun oo bulshada kunool deegaanka.
- dhinaca kor u qadida adeega daawada waxaa la hawlgaliyey **7** goob daawo oo casri oo loo yaqaan APTS. Dhinaca kale Waxaa la gaadhsiiyay **100%** daawada budgetka. (RDF) ah sagaal gobal oo kala Fafan, Jarar, Dollo, Qorexey, Dhawa, Afdheer, Shabelle, Nogob iyo Erer.
- dhinaca shaqaalaynta Sanadka waxaa lagu guulaystay in lashaqaalaysiiyo xirfadle caafimaad oo ay tiradoodu dhan tahay **2,498** xirfadle. Kuwas oo lagu meeleeeyay

dhamaan goobaha adeeg bixinta ee ilaa rug caafimaad korna u qaaday “xadiga xirfadlaha iyo bulshada”

- Waxaa lagu guulaystay xakamaynta cudur dilaacyda cholera, jadeecada degmooyinkii hore ee ay saamaysay jadeecadu. Dhinaca kale si loo xoojiyo dadaalka lagu joojinayo jadeecada Waxaa qabsoomay ololaha talaalka Jadeecada dheeriga ah iyo adeegyada iskudhafka ah kaas oo degmooyinka deegaan ka laga fuliyay laguna talaalay carruur da’doodu kayartahay shanta sano oo dhan in kabadan 700,000 oo ciyaal ah, sidoo kalena ololaha talaal ka iskudhaf ka ee COVID 19 kaas oo laga talaalay dad gaadhaya **1, 3460,29** oo qof, halka uu qorshuhu ahaa in la talaalo dad dhan 1,500,000 oo qof una dhigan (89.7%).
- Dhinaca nafaqo darada-waxaa ladaweeyay caruur **174,915**.daawayntuna tahay/Cure rate **91.40%**.si dhamaystiran kuwaas oo isugujiray xaalad darán/SAM iyo xaalad Dhexdhexaada MAM. Waxaa sido kale vit-A lasiiyay caruur dhan **739,671 (89%)** xaga daawada gooryaanka lasiiyay caruur **606,697 (73%)** taas oo da’doodu udhaxayso **24-59** bilod.
- Dhinaca kaydka dhiiga waxa lagu guulaystay in lasoo ururiyo dhiig dhan **24,729** qandi. Iyadoo sandkan la sameeyay oleole baladhan iyo wacyigalin xaga dhiig ku deeqista taas oo bulshada iyo maamulkuba hormuud ka ahaayeen.
- Sidoo kale waxaa la xoojiyay adeega shaybaadhka iyadoo iyada oo la qaybiyey **65** waynayso- taas oo 35 kamida Weyneysada (**Microscopes**) la gaadhsiiyay xaruamah cafimadka xaga 30 micrsocope lasiiyey **TVETka** si kuuliyadaha caafimaadka loogu cawiyo. dhinaca kalena xarumaha cafimadka la gaadhsiiyay chemicada baadhida kala duwan.
- Dhinaca barnaamijka fidinta iyo daryeelka caafimaadka aas aasiga waxaa sicsub looga bilaabay hirgalinta caymiska caafimaadka bulshada **7** degmo iyo **3** MM laguna diiwaangaliyey xubno gaadha **32,556** qoys., waxaa sidookale dib u cusboonaysiiyey xubnimda **6,885** qoys lagana aruuriyey lacag dhan **3,345,170**-birr kuwaas oo ahaa xubnihii degmooyinka horay u bilaabay. Hadaba iado wadarta degmooyinka & MM caymiska bilaabay noqonayaan **14**.

- Dhinaca xogta casriga waxaa dhamaan deegaanka laga hirgaliyay nuqulka cusub ee maaraynta xogta **DHIS2.36** ga iyadoo la qaybiyey **8,435** buug iyo agabka diwaangalinta kala duwan nidaamka xogta caafimaadka. Sidoo kale diwaanada Rugaha caafimaadka oo tiradoodu ay gaadhayso **21,450**. Sidoo kale waxaa la qaybiyay **74** koombiyuutaro casri ah xaga degmooyinki hore ee haystayna loo dayactiray. Waxaakale oon qaybinay **245** Tablet iyo **245** simcards si lootayeeyo nidaamka xogta caafimaadka bulshada
- Dhinaca dabagalka adeega caafimaadka iyo daawada waxa la xoojiyey dabagalka goobaha caafimaadka iyadoo la bixiyey **112** liisanka xarumaha **475** liisamada xirfadlayaasha sidoo kale la dardar galiyey goobaha iibiya cunada.
- Waxa la xoojiyey adeega ka hortaga cudurka HIV taas oo wacyigalin toos ah la siiyey tiro ka badan **1080** xaga tababro la siiyey qaybaha bulshada sida ciidanka, dhinaca kale waxa tageero nafaqo lasiiyey xubnaha lanool HIV/AIDS.

11. Xafiiska Horumarinta Magaalooyinka & Dhismaha

- Hawlaha ugu muhiimsan waxqabadka **12-ka billood** ee S.M 2015 T.I ayay xusid mudan yihiin horumarinta kaabaysha dhaqaale ee magaalooyinka oo lagu guulaystay gabogabaynta Mashaariicaha **Laamiyada Godey 4.5 KM, Dhagax-buur 2.1 KM** iyo **Qabri-dahar 2.1 KM**. Waxaa **100%** ladhamaystiray Mashruuca Balaadhinta **Laydhka Magaalooyinka Fiiq. Wajaale, Qabri-bayax iyo Harta-sheekh** islamarkaana mashruucani ka koobayahay **7 haamood** oo ay mashruucan ka faa'idayaan donaan bulsho dhan **67,500**.
- Dhanka Mashaariicda dhismaha Xafiisyada Gobolada oo **11** ahaa ayaa **6** kamida dhamaadeen **100%** halka **5-da** kalana ay u dhaxeeyaan **90%-97%**. Sidoo kale waxaa **100%** la dhamaystiray qalabaynta shan xafiis gobol halka qalabaynta laba xafiis oo kale ay gabogabo marayaan. Waxaa kale oo **100%** dhamaaday **Afar mashruuc** oo laga wado xafiiska madaxwaynaha sida dib-ucasriyaynta xafiiska, dayrarka, Qalabaynta xafiiska, Dhiraynta iyo qurxinta xafiiska.

- Iyadoo horumarinta guryaynta ahmiyad la siiyay ayaa la qaatay in **15 Magaalo** laga fuliyo **164** Guryo Wadareed ah oo ka kooban **30 mashruuc**, taasoo **19** mashruuc **100%** la dhamaystiray halka inta kale ay meel fiican marayaan.
- Marka aan eegno hawlaha laga qabtay Qorshe-hagaha Magaalooyinka oo muhiim ah ayaa lagu guulaystay dhamaystirka **Structural Planka 10 Magaalo** qorshahuna ahaa **10**, Basic plan-ka **10 magaalo** halka **16 Magaalo** oo **Qorshe hagaha (Sketch plan ka)** loo samaynayay **100%** lagu guulaystay dhamaystirkooda, taasi oo tibaaxaysa in Qorshahii dhanka Diyaarinta Qorshe-hagayaasha Magaalooyinka **12-ka billood** ee S.M 2015 T.I Natiijooyin guulo ah laga soo hooyay. Dhanka Hirgalinta Qorshe-hagaha Magaalooyinka oo Muhiimad la siiyay ayaa Qorshihii ahaa in **21 Magaalo** loo fuliyo **18** kamida **100%** la fuliyay halka **5 Magaalo** oo kamidana **15%-80%** inta u dhaxaysa ay marayaan, labo magaalo ayaa hawsha fulinta kharash ahaan iyagu is dabaray xafiiskuna farsamo ahaan ka caawiyey.
- Qorshahii Horumarinta iyo Maaraynta dhulka magaalooyinka oo ahmiyad gaara la siiyay ayaa waxaa **100%** dhamaaday nidaamka kaydinta xogta casriga ee dhulka (**Cadastre**) ee Magaalada Qabri-dahar halka cadesterka magaalada Dhagaxbuur uu marayo **60%**. Waxaa kale oo **100%** dhamaaday mashruuca diyaarinta Darajada Dhulka (Land grading) Magaalooyinka Doolo-ado iyo Awbarre. Halka Mashruuca Diyaarinta xogta kaydka dib u isticmaalka dhulka lixda maamul magaalo la dhamaystiray **100%**. Waxaa la dhamaystiray daraasada xadaynta dhulka maamulka magaalada Qabribayax iyo Degmada Qabribayax.
- Waxaa Muhiimad gaara la siiyay dib u habaynta nidaamka hay'adeed ee Maamulada Magaalooyinka iyo Magaalooyinka Dawladaha Hoose guud ahaan si loo xaqiijiyo nidaam hay'adeed oo lagu suurtagalin karo Qorshaha **10 Sano** ee Magaalooyinka laguna suurtagalin karo awood fulineed oo heerarka kala duwan ah. Hadaba, si loo dhaqaajiyo waxaa **100%** la dhamaystiray daraasada dib uhabaynta darajooyinka magaalooyinka deegaanka iyadoo laga duulayo Xeer-Nidaamka Darajaynta Magaalooyinka tirsi 31/2013 T.I. Sidoo kale waxaa **100%** lagu guulaystay in la sameeyo daraasada tirada guud ee magaalooyinka deegaanka, waxaa kale oo **80%** maraya daraasada gundhiga xafiiska (**baseline assessment**).

- Siloo xoojiyo adeegyada dawladaha hoose ee magaalooyinka deegaanka ayaa waxaa tababar lagu kobcinayo awoodooda loo qabtay mayarada **50 dawlad-hoosaad**, waxaa sidoo kale 100% la dhamaystiray daraasada baahida cuduuda shaqaale ee laanta horumarinta magaalooyinka iyo dhismaha, waxaa dadaalada qayb ka ah tababarada wakhtiga dhaadheer iyadoo **18 qof** loo diray waxbarashada heerka labaad kuwaasoo soo baran doona culuumta la xidhiidha magaalooyinka. Waxaa kormeer iyo dabagalo joogto ah lagu sameeyay hanaanka adeegbixinta maamulmagaalooyinka deegaanka, waxaana la fuliyey daraasada qanaca macaamiisha adeegyada ay magaalooyinku siiyaan shacabkooda.
- Waxaa iyadoo laga duulayo jihadii heer dal lagu bixiyey ee horumarinta beeraha magaalooyinka xooga la saaray dhanka Beeraha Magaalooyinka oo laga qabtay hawlo muhiim ah oo ay ka mid yihiin in magaalada Jigjiga oo ah caasimada deegaanka si tijaabo ah looga bilaabay afar goobood oo beeraha magaalooyinka ah lagana beerayo khudaarta iyo geed-midhoodyada qaybohoo kaladuwan mashruucan ayaana maraya **83.75%**, waxaa kale oo heshiis lala sixiixday dhamaan maamul magaalooyinka deegaanka inay magaalo kasta beerto dhul ay baaxadiisu dhan tahay **500 hektaar** oo ay **300 oo hektaar** oo kamid ah loogu talagalay in laga beero khudaar xaga **200 oo hektaarna** loogu talo galay in laga beero geed midhoodka noocyadiisa kaladuwan.
- Ugu dambayn qorshihii isticmaalka miisaaniyada mashaariicaha xafiiska ee 12-ka billood oo ay qorshaysnayd in la siticmaalo miisaaniyad dhan **1,231,429,759.31 Birr** ayaa la isticmaalay **1,081,754,790.60Birr** taasoo ka dhigan in qorshaha isticmaalka miisaaniyada mashaariicda ee 12-ka billood tahay **87.85%**, halka isticmaalka mushaarka iyo hawlfulinta xafiiska ee 12-ka billood yihiin **96.5% iyo 100%** sida ay ukala horeeyaan.

12.Xafiiska Jidadka

- Xafiiska jidadka oo kamid ah xafiisyadi dib loogu habeeyay kalfadhigi **1^{aad}** ee baarlamaanki **6^{aad}** ayaa waxaa dib loogu celiyay xafiiska Jidadka DDS, isaga oo mudo labo sano ah ahaa Xafiiska **Jidadka Iyo Gadiidka DDS**. Hadaba, sanadkan **SM2015**

xafiisku wuxuu gacanta ku hayay mashariic dhan **23** mashruuc kuwaas oo iskugu jira **20** Jid Jay ah (Gravel Road), **2** Buundooyina ah (Bridges) iyo hal laami ah (Asphalt).

- Guud ahaan hadaba miisaaniyada sanadkan **SM2015** ee xafiiska oo ahayd **786,171,480Birr** taas oo ka dhigan Miisaaniyadi xafiisku u baahnaa **35%** Sanadkan, miisaaniyad yaraanta ayaa waxay caqabad ku noqotay habsami socodka mashaariicda xafiiska iyadoo xafiisku hakiyay **4 mashruuc** wax shaqo ahna laga qaban.
- Dhanka kale xafiiska ayaa sanadkan qorshu uqaatay dhamaystirka **300KM** oo ah wadooyinka ku yaala goobaha amni daradu ka jirto sida xuduudaha (Security Issues) iyo waliba goobaha ay kajiraan halista isku socodka dhanka Jidadka.
- Anaga oo ka duulayna qorshaha xafiska wuxuu xafiisku sanadkan dhisay **284KM** oo ah Jid jay ah halka xafiisku sanadkan diyaariyay qorshihi lagu bilaabi lahaa buundooyin ay maraan dadka iyo xoluhu meelaha wabiyada iyo togagu ku yalaan ee deegaanka iyadoo loo qaatay **15** gabood si tijaaba ah.
- Dhanka kale xafiiska ayaa wuxuu sanadkan qorshaystay dayactirka wadooyin dhan **6** wado kuwaas oo isku jira **200KM** iyo sadex boondooyin yar yar (Culvert) kuwaas oo uu xafiisku dhameeyay **100%**.
- Dhanka kale, mashaariicaha ay wadaan heer Federaal ayaa dhab **25** mashruuc dherer ahaan dhan **1,765.58KM** oo ay ku baxayso **26.84** Billion Birr

13.Xafiiska Xirfadaha & Shaqo Abuurka

- Waxaa sanad miisaaniyadeedka 2015 la shaqaalaysiiyey **67** Macalin kuwaas oo isugu jira **darajooyinka B & A (degree & master)**.Waxaa ilaa hada la siiyey fursad waxbarasho macalimiin tiradoodu dhantahay **67**,islamarkaana lagu xareeyey jaamacadaha sida jig-jiga University, FTVETI & kuliyaada caafimaadka **jijig** oo qaadan doona heerkadegree koowaad iyo labaad (**Master Program**).Waxaa lasiiyey tababaro dhanka kobcinta awooda ah hogaaminta kuliyaadaha mudo **5 – 15** cisho ah, iyadoo lala kaashanayo wasaarada xirfadaha iyo shaqo abuurka ee **heer federal** waxaana qaatay **39** xubnood.Waxaa la siiyey tababarka habka baris barasho ee barayaasha kulliyadaha Caafimaadka **160** macalin (**115** heer deegaan & **45** heer dal).

- Waxaa la soo xareeyey aradaydii kulliyadaha horey ugu sii xaraysnayd oo tiradoodu dhantahay **2729 (2029 lab, 700 dh)**. Ardayda Cusub illaa hada waxaa soo xerooday **4,503 (L, 2889, Dh, 1614)** halka uu qorshuhu ahaa **7,500**. waxaa tababarada gaagaaban ee kusalaysan baahida suuqa la siiyo **10,882** arday (**6580 Lab** iyo **4302 Dhah**). Waxaa heer daboolka wacyigalinta habka minguurinta farsamooyinka casriga la gaadhsiiyo **80%**. Nidaamka kor uqaadida waxsoo-saarka tayada (**kaizenka**), waxaana ilaa hada latababaray macalimiin dhan **415** oo iskugu jira dhamaan kulliyadaha deegaanka. Hal abuurka ganacsiga (**Entrepreneurship**), waxaana ilaa hada latababaray macalimiin dhan **264** kuwaas oo iskugu jira dhamaan kulliyadaha macalinta lagu tababaro silsiladaha taxanaha macalimiin dhan **315** kuwaas oo kakala socday dhamaan kulliyadaha deegaanka
- Tababaro kala duwan oo ah habka minguurinta **100%** ee farsamooyinka casriga ah waxaana lagu tababaray macalimiinta tiradoodu dhantahay **217** habka minguurinta **100%** ee farsamooyinka casriga ah taas oo udhiganta **85%**. Waxaa xafiiska u uqorshaysnaa in uu taageero **1,959** shirkadood waxaana xafiiska oo la kaashanaya kulliyadaha uu siiyey taageero dhamaystiran **1,812** shirkadood taas oo udhiganta **92.4%**
- Guud sanadka 2015 Waxaa la soo diwaangaliyey **89,650** dhalinyaro shaqo la'aanta ah.
- Waxaa la qalabeeyey **17 xarumood** oo adeega hal good oo kala ah **16 xarumood** oo degmooyinka iyo xarunta model jigjiga oo si dhamaystiran loo qalabeeyey sidoo kale waxaa **15 degmo** oo aan lahayn adeega hal-goob laga aas aasay **15 xarumood**. Waxaa la soo diwaangaliyey **5,469** oo ah shirkadaha aan ahayn ganacsiga sharciyeysan ee loo yaqaan (**informal business**). Waxaa Tababarka habka maamulka ganacsiga lasiiyay (**business management training**) gaar ahaan xisaab haynta lasiiyo shirkado dhan **460 shirkadood**. Waxaa qorshaysnaa in lasoo qiimeeyo heerka koriinka shirkadaha oo dhan **2023 shirkadood** waxaana lasoo Qiimeeyay heerka koriinka darajadooda **1,959 shirkadood** taas oo lagaadhay **93%**, Diwaangaliyo shirkado dhan **1,581** oo isugu jira **1,158** shaqaysa iyo **433** aan shaqaynin.
- Waxaa labixiyay adeega daymaha oo dhan **445,690,387-birr** oo daynta caadiga ah (**refular loan**). Waxaanaladhisay **7** goobood oo loogu talagay ganacsiga shirkadha (**shade**).

- Waxaa la diyaariyey dhul dhan **263.8 heक्टर**.Xulashada ka faa'iidaystayaasha iyo xaqiijinta muwaadiniinta looga faaiidaynayso lacagta daynta wareegta (**Revolve Fund**), waxaa degmoyinka iyo maamul magaa looyinka laga soo xulay **626 Shirkadood** iyo **558 dumar ah**
- Waxaana lasooceliyay dayn dhan **116,331,580.17 Birr**, kasoo noqotay daynta wareegta ee shaqo abuurka.
- waxaana ilaahada fursado shaqo helay muwaadiniin tiradoodu gaadhayso **136,077 qof** lab ku waa **68,552** halka dhadigu yahay **65,492** taa soo u dhiganta 85% uu hirgalay qorshihii shaqo abuurka ee **12 ka bilood** S.M 2015 T.I
- Waxaa dhamaatay kuliyaadaha xirfadaha beeraha ee **Ereroo** soo socotay sadexdii sano ee la soo dhaafay taasoo sanad miisaaniyadeed 2016 bilaabi doonta shaqooyinkii loo aas aasay kuliyaada.

14.Xafiiska Ganacsiga & Gaadiidka

- Waxaa qorshaysnaa in laqabto Tababarka nidaamka dabagalka ganacsiga wuuna qabsoomay
- Waxaa qorshaysnaa shirwaynaha ganacsiga ee heer gobol, degmo iyo maamul magaalo wuxuuna u qabsoomay sidii loogu talagay
- Waxaa qorshaysnaa adkayta iskuxidhnaanta sectorka ganacsiga ee Gobolada, Degmooyonka iyo Maamul Magaalooyinka.
- Waxaa laqabatay nidaamka dhismaha rugaha ganacsiga (**Chamber of commerce**) ee lixda maamul magaalo.
- Waxaa dardargalin lagu sameeyay ladagaalanka ka ganacsiga shidaalka sida sharcidarada uga baxa deegaanka. Waxaana la hakiyey shatiyadii shidaalka **8 kaalmood** muudo **6 bilood** ah ka dib markey si sharci darra ah uga dhoofiyeen deegaanka Waxaa la qabtay shidaal sharcidaro ah oo cadadkiisu dhanyahay **115,000** litir iskugu jira,besin,naafto,gaas

- Waxaa ganaax lacageed loo jaray **54 kaalmood** oo ku dhaqmi wayey qiimaha shidaalka ee ay dawladu jaangoysay, waxa ganaaxaa dakhli ahaan looga soo xereeyey dakhli dhan **1,400,000** Birr
- Guud ahaan waxaa Kaalmo shidaal leh, **6da MM & 29 Degmo** oo kaliya, Guud ahaana kaalmaha deegaanka ee shaqeeya waa **130** Kaalmood
- Waxaa qorshaysnaa inuu deegaanku helo 2,348 Booyadood oo Naafto ah, balse waxaa deegaanka soo gaadhay **2,079** Booyadood oo Naafto ah, waxaa dhimaal ah oo wali Deegaanka kamaqan 392 Booyadood oo Naafto ah oo udhiganta in **(11%)**
- Waxaa kooto la'aan ama bilaa qoonde lagusoo dhaamiyey **123 booyadood** oo naafto ah, taasoon qorshaysnayn, balse deegaanka soo gaadhay
- Waxaa qorshaysnaa inuu deegaanku helo **1,247** Booyadood oo Benzene ah, balse waxaa deegaanka soo gaadhay **928 Booyadood** oo Benzene ah, waxaa dhimaal ah oo wali Deegaanka kamaqan **379 Booyadood** oo Benzene ah oo udhiganta in **(25%)**
- Waxaa kooto la'aan ama bilaa qoonde lagusoo dhaamiyey **60 booyadood** oo benzene ah, taasoon qorshaysnayn, balse deegaanka soo gaadhay
- Deegaanka waxaa kajira **130 kaalmood**, Waxaa Tele Birr Furtay kuna iibiya **125** Kaalmood
- Tele-Birr Electronic Fuel Payment = **540,471,093 Birr**
- CBE-Birr, Electronic Fuel Payment = **76,876,422 Birr**
- Waxaa la dhisay Gudi isku dhaf ah oo lo xilsaaray xalinta Caqabadaha hortaagan dhismaha istaanka cusub ee jigjiga Waxaa la diyaariyay Qiimaha magdhawga **25 Qoys** oo daganaa Gobta istaanka cusub laga dhisayo. Lacag magdhawga oo cadadkeedu yahay **1,112,000 Birr**
- Mashruuca dhismaha xafiiska oo ay ku geedaamanyihiin caqabado dhanka lahaansha dhulka oo hada maraya **81%**, Mashruucas kolkuu dhamaado waxaa adkaanaysa shaqa galkiisa maadama hareeraha ka daganyihiin dad sheeganaya lahaashaha dhulkaas.

- Waxaa lasoo wareejiyay adeega baadhitaanka gaadiidka sharcidarada looga shakiyo kaasoo markii hore loo doonan jiray deegaamada Oromia, Hararida iyo Ismaamulka Dirir dhaba, isla markaana baadhitaan lagu hubiyay gaadiid dhan **78**.
- Waxaa gobolada deegaanka la geeyay taarikada Code-1 ka ah tasoo mudo sanado ah la sugayay, waxaana lasoo qabtay document been abuura oo dhan **58** tasoo sharciga la mariyay dadka so sameyay documntiga been abuurka, Waxaa taarikooyin la gaadhsiiyay dhamaan gobolada marka laga reebo gobolka nogob. taarikooyin dhan, **4,399**.
- Waxaa la hirgaliyay shuruucda gaadiidka Magaalada Jigjiga, Oo lagu soo ogaadey inaysan dirawaliin badan aanay haysan liisanka xaqiijinta dirawalnimada, isla markaana iyadoo qiimo dhimis dhan **60%** loo sameeyay, laguna xareeyay dugsiyada tababarka dirawalnimada kaaso dirawaliin dhan **320 (Special Package)**.
- Waxaa imtaxaanka xaqiijinta dirawalnimada laga soo qaaday dugsiyada tababarka dirawalnimada ee gobolada iyo M. Magaalooyinka deegaanka.
- Waxaa kormeer & dabagalka lagu samaysay **16 dugsi** oo ah dugsiyada tababarka kartida wadaha, iyadoo loo eegayo shuruucda iyo xeerarka looga bahanyahay dugsiyada tababarka ayay gudiga mareynta xafiisku go'aan ka gadheen iyada oo la xidhay **4** xarumood, **9** xarumoodna digniin la siiyay.
- Waxaa la jaangoyay lana hirgeliyay noolka gaadiidka dadweynaha iyada oo laga duulayo daraasad lagu sameeyay dhamaan sababa kor u kaca noolka.
- Waxaa la sameeyay kooxo iskugu jiro Shaqaalaha Dabagalka gaadiidka ee heer degaan, heer Gobol iyo taraafikada si loo xojiyo hawlaha maalin laha ah ee dabagalka gaadiidka waxaana la daba galay gaadiid dhan **20,680**
- Waxaa la lasiiyey **1,680** dirawalin isugu jira gaadiidlayda qaybahooda kala duwan ah wacyigalin kusaasban badbaadada jidadka iyo ilaalinta shuruucda gaadiidka
- Waxaa la qabtay **70** xabo ruqsad dirawalnimo oo foojari ah (Driving license)
- Waxaa wacyi galin loosameeya gaadiidka dadwaynaha ee M.M jigjiga kasoo laga wacyi galinayay adeega qiimo kabista ee shidaalka.
- Waxaa gaadiid dhan **22** oo duugoobay loo badalay bixinta adeega isku socodka magaalada dhaxdeeda (Public transport)

15.Xafiiska Warshadaha, Maalgalinta & Qurbojoogta

- Waxaa la qabtay tababar ku saabsan nidameedka dhiirigalinta maalagshadayaasha sidii ay uga faaiidaysan lahayeen xidhmooyinka dhiirigalinta maalagashiga ee sharcigu ufasaxayo, waxaana ka soo qayb galay maalagshadayaasha deeganka.
- Waxaa tababar ku saabsan bayaanka maamulka maalagashiga deeganka fahan laga siiyay maamulka magaalada jigjiga & dagmada shinile isla markaan laga dhisay gudiga maamulka maalgalinta heer maamul magaalo iyo dagmo xilka iyo waajibaad koodana loo sharaxay xubnaha gudiga maalmulka maalgalinta.
- Waxaa la soo xareeyay daraasaad ku samaynta awooda/fursadaha maalgashi ee ay leeyihiin gobalada shabeele sitti, iyo fafan oo ka soo wareegay sanad miisaniyadeedka 2014 oo dhan **40 project profile 100%**.
- Waxaa la sameeyay daraasad kooban oo ku saabsan nidaamka maalagashiga deeganka iyo habraacyada adeeg bixinta maalagashiga oo lagu ogaanayey caqabadaha iyo golluleelada kajira nidaamka adeeg bixinta macaamiisha uu u adeego xafiisku dhanka maalagashiga bixinta shatiga maalagashiga dhiirigalinta iyo nidaamka dhulka loobixiyo dhamaan adeegaydaas oo lagu saleeyay bayaanada maalagashiga iyo qaynuunada iyo habraacyada sharciga.

Dhiirigalinta maalgaliyaasha (incentives)

- Waxaa dhiirigalin loo sameeyay maalqabeenada kuguda jira fulinta mashriicda kaladuwan ee maalagashiga oo loo sameeya canshuurdhaf qalabka kala duwan ee ay dibada kala soodagayaan sida qalabka dhismaha, gaadiidka iyo mashiinada sidoo kale wax soosarka maalqabeeno dhan **82** mudadii lixda bilood ahayd ee la soo dhaafay looguna gudbiyay wasarada maalayida iyo dhaqaalaha dalka, nidaamka casiriga ah ee **Ethiopian Electronic Singal Window System**
- Waxaa waraqaha taageerada sida dhulka, laydhka iyo adeegyada kale kaga xidhnaa maalgaliyaasha xafiisyada loo qoray **47**maalagliye
- Waxaa dhul maalgashi lasiiyay **45**maalagshade dagmada shinile iyo maamulka magaalda jigjiga, gobalka Shabeele

- Wuxuu xafiisku dadaal ugalay sidii uu usoo jiidaan lahaa maalqabeenada caalamiga ah iyo kuwa dalka isaga oo abuurayana jawi ku haboon maalgashiga deeganka una soo bandhigaya maalqabeenada furadadaha maalgashi ee ka jira deeganka iyo in deeganku leeyahay khayraad ku haboon maalgashiga sida **Beeraha, Xoolaha, Warshadaha, Macdanta Iyo Adeega Shacabka**, dadaal kadib waxaa xafiiska u suurta gashay in uu siiyay shatiga maalgashiga maalqabeeno tiradoodu dhan tahay **211** kuwaas oo isugu jira qurbajoog iyo qaranjoog, wadarta hantida maalgashigooduna dhanyahay birr **5,735,633,128.88** bilyan ayada oo gundhiga laga dhiganayo sanad miisaniyadeekii tagay ee 2014TI **456** shati in labixiyo, fursadaha shaqo ee lafilayo inay u abuuraan muwaadiniinta waa **6626** qof shaqaale ah oo isugu jira shaqaale jogta(**3596**) iyo shaqaale kuwo kumaeelgaadha (temporary job) oo dhan(**3030**)

Dhanka Abaabulka Qurbo Jogta

- Waxaan adeeg siinay qurbajoogta rabta in ay qaataan kaarka daganaanshaha ee **yellow card** kuwaas oo dhan **361** qurbajoog ah.
- Waxaan so dhaweyn iyo adeegsiinay qurbajoog dhan **783** kuwas oo ka kala yimid qaaradaha kala duwan ee dunida, una kala yimid booqasho, maalgashi, daganaansho, indho-indhayn iwm.
- Waxaan warqad tageero ah (support letter) u qornay qurbajoogta rabta adeegyada kala duwan ee xafiisyada kuwaas oo dhan **41** qurbajoog ah.
- Waxaa gabo-gabo ah furitaanka iyo ka shaqaysiinta **Diaspora Account** loogu tala galay in uu qayb weyn ka qaato horumarka deegaanka.
- Waxaan dhisnay ururka qurbajoogta deegaanka oo ka qayb qaadanaya howlaha iyo shaqooyinka horumarineed ee dalka iyo deegaanka
- Waxaa la Aas Aasay Xarunta Adeegbixinta Qurbajoogta (**Establishing Diaspora Window Shop Unit**)
- Waxaa la Dhamaystiray oo la kala Saxeexday Heshiiska Aas Aasida Xarunta Adeegbixinta Qurbajoogta 9ka Xafiis ee adeegyadooda la iskugu keenayo Xarunta (MoU for the establishment Diaspora Window Shop Unit was signed between between stakeholders). Waxaana la Diyaariyay Hool Xarunta Adeegbixinta qurbajoogta (Diaspora window shop unit). Sidoo kale Waxaa la soo iibiyay qalabki iyo furnitureki

shaqalaha xarunta laguna xereeyay Hool Xarunta Adeegbixinta qurbajoogta (**Diaspora window shop unit**). Waxaa lagu jira kuso melaynti shaqalaha xarunta ee xafiis walba ujoogaya (Waxa laso meeleyay **30%** shaqalaha Xarunta, waxaana dhiman **70%**).

- Diyaarinta Xeernidameedka Horumarinta iyo Maamulka Guryaha Qurbajoogta Degaanka (Diaspora Housing Development & Administration Directive)
- Waxaa khibrad wadaag lala sameeyay Dirdhabe, Degaanka Harar, Xafiisyada Federal ee horay usameeyay Shuruucd Aas Aasida iyo Mamulka guryaha Xafadaha Qurbajoogta
- Waxaa kale oo lagaga kashaday Xafiiska Cadaalada DDS Diyaarinta Xeernidameedka Aas Aasida iyo Mamulka guryaha Xafadaha Qurbajoogta
- Waxa la dhamaystiray Diyaarintii Xeernidameedka dhaqangalinta Horumarinta iyo Mamulka guryaha Xafadaha Qurbajoogta

Diyaarinta Xogta Qurbajoogta Ku Sugaan Qaaradkasta (Preparation Diaspora Profile)

- Waxaa la diyaariyay su'aalihii xog ururinta qurbajoogta
- Waxaa lagu tababaray Xog ururiyaasha Nidaamka ay usoo urinayaan Xogta
- Waxaa la soo ururiyay dhamaan xogihii qurbajoogta ka diwaangashan dhaman xafisyada bahwadaagta degaanka
- Waxaa la soo ururiyay dhamaan xogihii qurbajoogta ka diwaangashan dhaman xafisyada bahwadaagta Federalka
- Waxaa lagu guda jiraa Diyaarintii Warbixinta Xogta Qurbajoogta degaanka

Kormeerka iyo dabagalka mashariicda maalgalinta

- Waxaa kormeer lagu sameeyay mashaariicaha maalgelineed ee ka jira dagnada shinile, maamulka magaalada jigjiga, si loo ogaado xaladda ay ku sugan yihiin mashriicdaas oo tiro ahaan dhan **174 mashruuc** oo kala ah **warshado, hotel, realstate**, dhaman mashariicdaa ayaa ku kala sugan xaalado kala duwan.

16.Xafiiska Macdanta iyo Tamarta

- Guud ahaan deegaanka ayada oo ay jiraan baahi in daraasaadka macdanta kala duwan laga sameeyo, ayaa waxaa daraasaadka macadanta kala duwan laga sameeyay

dagmooyinka dhekaasuufi, mubaarig, Harawoshabeelay, mooyaale, Dambal, Ayshica, Hudhat, celkariqubi, salaxaad, cayuun Awbar Eraragoto.

- Waxaa kormeero iyo dabagalo kala duwan lagu sameeyay guud ahaan shirkadaha macdanta kala duwan ee ka jira dagmooyinka Hargeele, **Dhekaasuufi**, mooyaale, **Ayshica**, **Erar**, **SHiniile Dambal**
- Waxaa baadhitaan lagu sameeyay **147kg** oo macdanta kala duwana oo lugu soo baadhay labarotoriga magaalada Adais Ababa, waxaana la soo xaqiijiyay **86kg**
- Wasaarada macdanta oo deeq waxbarasho laga helay ayaa wuxuu xafiisku diray 3 qof in ay usoobartaan culuunta naloogu deegay.
- Regional mining labarotery oo ay howl wadeenada agabka uu u baahnaa ka soo uruuriyeen. Shaybaadhka macdanta Adis Ababa.
- In laga furo deegaanka bangiga dahabka oo aan ka codsanay wasaarada macdanta oo meel fiican maraya
- Waxaa laysamada macdanta kala duwan la siiyay **63** shirkadood
- Waxaa dakhliga macdanta ka soo xarooday lacag dhan **62,203,953.23**

Dhinaca tamarta

- Guud ahaan deegaanka ayada oo ay jiraan baahi dhanka tamarta kaladuwan ayaa waxaa laga fuliyay dagmada Gursum qabaleega qudhacmataa **50God** oo ah tamarta laga dhaliyo digada lo,da
- Waxaa barakacayaasha iyo danyarta dagooyinka gaashaamo iyo Erar goto loo soo iibiyay soolarada cadceeda **1,040 qoys** loona qaybiyay
- Waxaa dabagal iyo qiimayn lagu sameeyaya soolaarada iyo godadka Biogas ee ka jira dagmooyinka **Daroor, Awaare, Danood, Ayshica, Gursum,**
- Waxaan wasaarada biyaha & tamarta. ka helnay **115** xarumo oo **solar system** lagalin hayo oo iskugu jira **50** xarumaha caafimaadka ,**50** iskool **6** boodhan **9** solarada heertulo

Dhinaca shidaalka

- Waxaa kormeer iyo dabagal lagu sameeyay **75**kaalmaha shidaalka ookuyaala **6** maamul magaalo
- Waxaa kormeer iyo dabagal lagu sameeyay shirkada qoda ceelasha shidaalka ee dagmooyinka **Elale, dhoobawayn**

17.Ilaalinta Deegaanka & Maamulka Dhulka Miyiga ah

Shaqooyinka Laga Qabtay Dhinaca Ilaalinta Deegaanka

- Waxaa Daraasad lagu sameeyay xaalada Buurta **Karamardha**, dhibaatooyinka xaalufka ee loo geystay & saameynta ka dhalatay, iyadoo laga tabaalo qaaday **5-tii Karaasharo** ee saarnaa, lacag Ganaax & Dakhli isugu jirtana laga soo xareeyay.
- Waxaa kale oo Wacyi Galin Balaadhan oo ku saabsan Nidaamka Maareynta Qashinka Qallalan la siiyay **1,500 Xubnood** oo laga soo xulay, 6-da mmagaalo, iyo Tababarka Mashruuca UIIDP oo **80 Xubnood** oo lixda Maamul Magaalo ka socday la siiyay. Sidoo kale waxaa si Meeqaam sare leh Maalinta Deegaanka Aduunka loogu xusay Buurta Karamardha Ee MMJ.
- Wuxuu Xafiisku baadhitaan ku sameeyay in mashaariicda horumarineed ee **7 Xafiis** oo Heer Deegaan ka mid ah loo fuliyay Nidaam Waafaqsan Shuruucda Ilaalinta Deegaanka. Waxaa kale oo uu Xafiisku sameeyay in uu Maareeyo Jeex-Jeexyada **150 Hektar** oo ku kala yaala Degmada Birqod iyo Buurta Karamardha.

Shaqooyinka laga Qabtay Dhinaca Horumarinta Kaymaha

- Waxaa Balaadhin & Dayactir lagu sameeyay **3-da Goobood** ee Goobaha barbaarinta dhirta ee Dh/buur, Ceel Weyne, Qalaafe & Goobta Casriga ah ee Barbaarinta Dhirta, lagana soo saaray **1,850,000** oo geed. Si loo dar-dar galiyo la dagaalanka Goynta Dhirta iyo dhuxuleysiga Sharci darada ah ee **11-ka Gobol** iyo **18 Degmo** ayaa waxaa la soo saaray Bayaanka, Awaamiirta & Tilmaamaha **Isticmaalka Dhuxusha**, Korna loogu qaado wacyiga Bulshada ee ku aadan Ilaalinta dhirta.
- Waxaa sidoo kale kulan balaadhan oo ay ka soo qeyb galeen Xafiisyo Heer Federal, Kabineega Deegaanka & Hay'ado Caalami ah lagu qabtay Xaf. Madaxtooyada si dib loogu soo nooleeyo dhulka Qallalan ee Degaanka.

- Waxaa kale oo Dhireyn & Dib Udhireyn (**Afforestation & Deforestation**) Kaymaha Dhulka Xaalufay lagu sameeyay **2 Degmo** oo Tijaabo Loo Qaatay Dhul dhan 30 Hektar.
- Waxaa la qabtay Shirka Gudiga Farsamada Dhir Beerista oo ay ka soo Qeyb Galeen **23 Xafiis** oo Heer Deegaan ah.

Shaqooyinka laga Qabtay Dhinaca Noolleyda Kala Duwan / Duurjoogta

- Si loo daryeelo loogana faa'ideysto Noolleyda kala duwan iyo Duurjoogta Deegaanka ayaa waxaa tababar ku saabsan Xakameynta ka Ganacsiga Sharci Darrada Duurjoogta la siiyay **440 qoys** oo laga soo kala xulay **8 degmo** oo ka tirsan Gobolada Faafan, Siti, Dollo & Jarar. Waxaa kale oo lagu guuleystay in Naqshadeyn lagu sameeyo **Filin Documentry** ahna laga sameeyo Bey'ada Qari Jiqood (**Kari Jikod Comprehensive Ecosystem Mapping**), waana shaqo meel fiican mareysa.
- Waxaa intaa dheer oo Wacyi Galin la siiyay Bulshada Degan Goobaha Duurjoogta ku Nooshahay ee Baabili (**Babile Sancturay**) oo gaadhaya **20 Qoys**.

Shaqooyinka laga Qabtay Dhinaca La'qabsiga Isbedelka Cimilada

- Si wax looga ogaado Saameynta Isbedelka Cimilada ayaa waxaa **2 tababar** ku kala saabsan Heerka Saadaasha Cimilada & ku Saleynta Qorshayaasha Horumarineed Xafiisyada Dawlada & kan Laqabsiga Isbeddelka Cimilada la siiyay **10 Xafiis** oo Heer Deegaan ah. Waxaa kale balaadhin lagu sameeyay Mashruuca Dabar Goynta Geedka **Garanwaaga** iyadoo Mishiinka Geedka Garanwaaga u badalaya Calafka Xoolaha loo soo iibiyay Iskaashato Degmada Q/dahar ka aas-aasan oo **25 Xubnood** ka kooban.
- Waxaa kale oo uu Xafiisku Cilmi-Baaris iyo Daraasad tijaabo ah oo ku saabsan Sababaha keena Isbeddelka Cimilada iyo Abaaraha Deegaanka ku soo noq-noqday lagu sameeyay **4 Degmo (Moyale, Mubarak, Hudhat & Qadaduma)**. Waxaa kale oo la qabtay Madal lagu Soobandhigo Macluumaadka la xidhiidha Heerka Isbedelka Cimilada Deegaanka (**Seasonal Climate Outlook**), waana shir joogta ah oo sanad walba la qabto.

Shaqooyinka laga Qabtay Dhinaca Maamulka & Isticmaalka Dhulka Miyiga

- Waxaa Diwaangalinta Dhulka Miyiga & Dhul Beereedka Degmooyinka Xuduuda Oromiya lagu sameeyay laguna soo diwaan galiyay dhul beereed dhan **600 Beerood**. Iyadoo Bulsho dhan **2,400 qof** ee degmooyinka **Mooyaale, Hudat, Qarsala Dhula** iyo **Dhekasufti** laguna wacyi galiyay Qaadashada Shahaadada la'haanshaha Dhulka. Waxaa intaa dheer oo la soo daabacay **1,000** Shahaado oo ah Shahaadada La Haanshaha Dhulka ah, waxaana laga bixiyay oo ilaa iyo hada la qaatay **250 Shahaado**, iyadoo laga soo xareeyay Dakhli dhan **318,818 oo Birr**.
- Waxaa si rasmi ah Diwaan Galinta Dhulka looga bilaabay **6 Gobol** oo Deegaanka ka mid ah, iyadoo Mashruuc Tijaabo ah oo Isticmaalka Dhulka laga hirgaliyay Degmada Birqot ee Gobolka Jarar

Shaqooyinka laga Qabtay Dhinaca Adeeg Bixinta & Maamulka Suuban

- Nidaamka Adeeg bixinta Xafiiska oo la saxay, iyadoo la dhisay Goobta Qaabilaada Dadweynaha, Dabagalka & Qiimeynta Rubuclaha ah ee Mashaariicaha Xafiisku fuliyo. Waxaa Balaadhin lagu sameeyay **Page-ka & Website-ka** Xafiiska. Si sidoo kale loo sugo amaanka Xafiiska loona adkeeyo Dabagalka shaqaalaha ayaa waxaa Xafiiska lagu Rakibay **CC-Camera System**.
- Waxaa dib u habeyn & wax ka badal lagu sameeyay Gudiyada Xafiiska ee **libka, Anshaxa iyo Cabashooyinka**. Dhinaca **BSCC**-ga waxaa la Diyaariyay lana Daabacay **Axdiga Muwaadinka**, lana Dhameystiyay Bilciyaha Dhamaan Waaxaha Xafiiska.
- Waxaa Shaqaalaha Xafiiska la siiyay tababarada **BPR. BSC. KAYZAN & Axdiga Muwadiniinta** & Orientation la xidhiidha Qaabka ay u dalbanayaan Xuquuqahooda

18. Xafiiska Maaraynta Khataraha (DRM)

- Waxaa raashimada gurmada deg-dega ah iyo agabka aan cuntada ahayn (**NFI**) la gaadhsiiyay dadka dhibaatooyinka colaadeed ay saameeyeen ee ku-sugan degmooyinka kala ah Ma'ayso, Erar, Afdem, Gotabiki, Shiniile, Ayshaca iyo Gablalu, God-God, Qooxle, Baarey, Hargeele, Celkari, Feer-feer, Adadle, Moyale, Hudhat, Mubarak iyo Guradhamole ee gobolada Sitti, Afdheer, Liban, Dawo iyo Shabeel

waxaana la gaadhsiiyay noocyada raashimada kala ah Bariis **14,501.88 Kintal**, Sonkor **5,220 Kintal**, Galay **540 Kintal**, Makaroono **50 Kintal**, Boorash **5,929.5 Kintal**, Saliid **8,015.33 Kintal**, Timir **7,883.75 Kintal**, Buskad **2,100 Kintal**, Caano **155 Kintal**, Qasaac/suugo: **105 Kintal**, Biyaha nadiifta ah **1,216 Darsin**, Milix **5 kintal**, Caleenta-shaaha **18.5 kiis** iyo agabka aan cuntada ahayn (NFI) oo kala ah Dhar **39 buundadood**, Jeergaamo **5,461 xabo**, Bustayaal **5,325 xabo**, Caw/sijaayado **4,700 xabo**, Shiraacyo **4,609 xabo**, Saabuun **121 Kintal**, Maacuunta cuntada **7,677 xabo**, Garaafayaal **2,000 Xabo**, Beeshin **1,300 Xabo** iyo full NFI kits **2,000** Waxaana ka faa'iidaystay bulsho dhan **79,840** Qoys.

- Waxaa la sameeyay daraasaadka xili-roobadka dayrta waxaana laga sameeyay **22** dagmo oo ka kala tirsan **11** gobal ee deeganka iyadoo loo kuurgalayay xaalada roobka iyo habnoolaleddka dadka iyo duunyadaba.
- Waxaa la sameeyay oo la dhamaystiray qorshaha ka-jawaabida arimaha **deg-dega** ah sanadka **2015**ka.
- Waxaa la diyaariyay nidaamka kaydinta xogta digniinta hore ee **11ka gobal** waxaana la soo iibiyay **11** desktop oo wakiilada heer gobal loogu rakib doono xafiisyada si ay xogta ka imanaysa degmooyinka u habeeyaan kadibna la soo wadaagaan heer deegaan.
- Waxaa la qabtay daraasaadka fudud ee xaaladaha deg-dega ah taas oo laga sameeyay gobolada fatahaadu ka dhacday ee Dawo, Libaan, Shabeele iyo Afdher iyadoo lagu soo ogaaday in ay saamaysay in ka badan **58** Kun oo qoys.
- Waxaa kormeer, dabagal iyo taakulayn lagu soo sameeyay **998gooboodoo** ka kala tirsan gobolada, Doolo, Nogob, Jarar, qoraxey iyo Faafan.
- Waxaa la soo iibiyay sadex doomood **3** oo loo isticmaali doono goobaha fatahaada xiliyada ay dhacdo fatahaada.
- Waxaa dib-udajin loo sameeyay **129** qoys oo daganaa xerada qolaji oo hada la'dajiyay qabalaha dhurwaale ee degmada qabribayax.
- Waxaa dib-ucusboonaysiita (Woreda Risk Profileka) laga sameeyay **4** degmo ee kala ah: Ayshaca, Dhadhamane, Dagahbur iyo Harshin.

- Waxaa la soo sameeyay daraasad lagu ogaanayo fursadaha kala duwan ee ay heli karaan bulshada xoola dhaqatada ah iyadoo laga soo sameeyay degmooyinka kala ah: Harshin, Bokh, Ma'eyso iyo Hargele.
- Waxaa la sameeyay daraasada goobaha dib-udajinta barakacayasha waxaana laga soo sameeyay degmooyinka kala ah Wardheer, Shinile, Erer, Awbare, Ceel ogaadeen iyo Goljano.
- Waxaa meel fiican marayo dhamaystirka dhismaha **100**ka guri ee magaalo-cad wuxuna dhamaan donaan 30ka bisha sane sida ku cad qorshaha.
- Waxaa meel fiican marayo dhamaystirka dhismaha **70**ka suuli ee goobta dib-udajinta ee bayaxow waxayna dhamaanayaan 30ka hamle sida ku cad qorshaha.
- Waxaa kormeer iyo dabagal lagu sameeyay haya'adaha ka shaqeeyo mashaariicda emergencyga ee ka howl-gala gobolada liban, shabeel, fafan, Doolo, Qoraxey iyo sitti iyadoo komeerka lagu gaadhay **40** mashruuc.
- Waxaa daraasaadka fudud ee xaaladaha nafaqada caruurta **5** sano ka yar laga soo sameeyay degmooyinka kala ah: **Qubi** iyo **Fiiq** ee gobalka **Erar**.
- Waxaa kormeer iyo dabagal lagu soo sameeyay mashaariicda xafiiska ee goobaha dib-udajinta barakacayaasha ee **magaala-cad, Jedane, dhurwaale, Bayaxow iyo Robda'ay**.
- Waxaa wacyigalin kusaabsan nidaamka diginiinta hore ee fatahaadaha laga sameeyay **3** degmo oo ka tirsan gobolka shabeele oo kala ah **Qalaafe, Mustaxiil iyo Godey**.
- Waxaa la qabtay kulamo fagaarayaal ah oo lagula kulmay gudiga dhaqaale ururinta heer deegaan iyo **3 gobaal** waxaa si guud lagu casuumay kulankan in ka badan **264 xubnood** oo ka kala yimid rugta ganacsiga, guurtida dhaqanka, gudiga abaaraha, culimada iyo shaqaalaha xafiiska.
- Waxaa garaadkooda aqooneed kor loo qaaday **442 xubnood** oo ka tirsan howl-wadeenada xafiiska ee heer deegaan, gobal iyo degmo.
- Waxaa la aas-aasay oo la tababaray **660** gudiyo digniinta hore oo laga dhisay **33** dagmo ee gobolada Erar, Nogob iyo Afdheer.
- Waxaa socda dhamaystirka dayactirka bakhaarada jigjiga waxayna maraysaa meel fiican.

19.Xafiiska Shaqada & Arrimaha Bulshada

Daryeelka Carruurta Darbi Jiifka ah

- Sannadkan Xafiiska Arrimaha Bulshadu wuxuu qorsheeyey in daryeel dhaqan celin ah loo sameeyo **301** carruurta darbi jiifka ah. Hadaba, daryeelka carruurtani wuxuu 48 dugsiyada hoyga ee deegaanka ayaa la kala geeyey, **151** qoysaskoodii ayaa dib loogu celiyey halka **102** ay wali way XaraysanyihiinIntii ay xaraysnaayeen carruurtan waxaa loo fidiyey adeegyo kala duwan oo ay ka mid ahaayeen **nafaqo, caafimaad, arrad tir,** waxbarashada aasaasiga ah, iyo ta ugu muhiimsan oo ah in laga gooyo maandooriyaha ay la qabsadeen.

Taakulaynta dadka baahiyaha gaarka ah qaba (DBG)

- Marka aan eegno dhanka daryeelka loo fidiyey dadka baahiyaha gaarka ah qaba, sannadkan xafiisku wuxuu ku talo galay in agabka socodka lagu caawiyo tiro dhan **360 qof** oo **DBG** ah. Agabkaasi waxay kala ahaayeen **150 kursi (wheelchair), 100** ulaha lagu socdo ah (**crutches**), 5 sameecadaha maqalka ah (**hearing aid**), **5** ulaha hagidda ah (**mobility canes**), iyo **100 mooto bajaj**. Dhammaan agabkaas waa la wada bixiyey marka laga reebo **100ka mooto bajaaj** oo la soo gaday walise aan soo gaadhin gacanta xafiiska.
- Dhanka kale qaybo ka mid ah **DBG** ayaa loo fidiyey tababarro kala duwan **100 qof** oo **DBG** ah waxaa loo fidiyey tababarka kobcinta awoodka**40 qof** waxaana la siiyey loona tababaray sida loo isticmaalo **makiinadaha** harqaanka. Dhanka waxbarashada **DBG 68** arday oo **DBG** ah ayey haayadda **ECDD** ku xaraysay Kuliyadda Farsamada waxayna qaataan tababaro soconaya **2** bilood oo ku saabsan farsamooyinka **alxanka, faaradda, qurxinta dadka (salon),** iyo harqaanka. Intaas waxaa dheer in ay haayadda **ECDD** kuliyadda farsamada ka hirgalisay waxbarasho kulmis ah (**inclusive**) oo **DBG** loo diyaariyey fasallo, guryo jiif, iyo suuliyo ku habboon xaaladdooda.

Gargaarka Abaaraha iyo Colaadda

- Baahiyaha uu xafiisku ka qayb qaatay wax ka qabashadooda waxaa ka mid ahaa **abaarihii** iyo **colaadihii** ka jiray qaybo ka mid deegaanka. Hadaba xafiisku isaga oo kaashanaya hay'adda**UNICEF** wuxuu gacan ka gaystay gurmaddii loo fidiyey dadkii ay

saameeyeen colaaddii gobolka Siti iyo abaarihii deegaanka ka dhacay gaar ahaan gobolka Afdheer. Wadar ahaan, waxaa la caawiyey **5,655 qoys** oo ay abaaraha iyo colaaduhu saameeyeen: **3,911 qoys** waxay ahaayeen gobolka Siti waxaana loo qaybiyey lacag dhan **21,263,450** halka **1,744 qoys** ahaayeen gobolka Afdheer ah, loona qaybiyey lacag dhan **41,424,103** oo loo bixiyey laba wareeg. Intaas waxaa dheeraa **717** qof oo **DBG** ah oo la siiyey **1,649,100 (2,300 Birr qofkiiba)**.

Dhanka Arimaha Shaqada iyo Shaqaalaha

- Arrimaha shaqada iyo shaqaalaha waxaa ka qabsoomay shaqooyin kala duwan sannadkan xafiisku wuxuu qaabilay **15 cabasho** oo ku saabsan shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha oo loo kala maareeyey sidan **13 kiis** waa la xalliyey halka **2 kiis** ayaa maxkamad loo gudbiyey. Dhanka kale, waxaa booqasho kormeer lagu soo maray **60** ka mid ah goobaha shaqada ee gaarka ah. Sidoo kale, waxaa la go'aamiyey oo dhawaan la dhisi doonaa Xarunta Shaqo Fudaydinta (**Employment facilitation center**), waxaana iska kaashanaya dhismaha Xafiiska Arrimaha Bulshada, Xafiiska Dhallinyarada iyo Ciyaaraha, iyo hay'adda ILO.

Xarunta Daryeelka Naafada

- Xarunta Daryeelka Naafada oo ka tirsan Xafiiska Arrimaha Bulshada waxay adeeg iyo taakulayn u fidiyey **692** qof oo qaba dhibaatooyinka laxaadka ah Adeegyada loo fidiyey waxaa ka mid ahaa samaynta lugaha, **pyshiotherapy**, **orthotics**, kuraasta naafada, ulaha la cuskado, iyo dayactirka qalabka xumaada.

Dhanka Kobcinta Awooda Xafiiska

- Sannadka 2015, waxaa xafiiska u qorshaysnaauna qabsoomay tababarro kala duwan oo kala ah **7 tababar** oo ka baxday miisaaniyadda xafiiska oo ay qaateen wadar dhan **827** tababarte iyo **5 tababar** oo uu xafiisku la kaashaday hay'adaha ka shaqeeya deegaanka waxaana qaatay wadar gaadhaysa **395** tababarte. Intaas waxaa dheeraa **2400** oo qof oo ka mid ahaa
- Waxaa ka faa'iidaydista mashruuca RPSNP **144,708 qof** oo (**phase 5**) waxaa la siiyey tababarka taageerada nafsi ah (psychosocial support), **264** oo ka mid ah **1,750** qof oo ka faa'iidaydista barnaamijka **UPSNP** waxaa la siiyey taageero nafsi ah sidoo kalae waxaa intaas dheer **47 ka** mid ah shaqaalaha bulshada ayaa la siiyey tababar ku saabsan

sidii ay dadkan ugu xidhi lahaayeen adeegyada aasaasiga ah sida caafimaadka, waxbarashada, iyo taageerada sharciga.

Dib u dejinta dad tahriib laga soo celiyey

- Waxaa dib u dejin iyo shaqo abuur loo sameeyey **9 qof** oo ay haayadda **IOM** ka soo celisay dalka Libya.

20. Xafiiska Haweenka iyo Caruurta

- Waxaa tababar lasiiyay ururada horumarinta Haweenka, kaaso laqa qabtay gobolka Shabele iyo Qoraxay dagmoyinka Goday, Dhanan, Q/dahar iyo mamulmagaalada qabri dahar laguna gaadhay 45 iskaashato oo kakooban 900 xubnood.
- Waxaa laqabtay tababar ku saabsan Hirgalinta xidhmada haweenka xoolo dhaqatada iyo xoolo dhaqato beeralayda ee haweenka deegaanka kaasi oo laga qabtay 4ta gobol ee kala ah Faafan, Shabeele, Libaan, Iyo Siti dagmoyinka, Sida Degmada Awbare, Degmada Tuliguleed, Degmada Beercano, Degmad Qalafo, Degmada Doloado, Dehmada Boqolmayo, Degmada Gotabik Iyo Degmada Eregoto tirada xubnaha ka faa iidaystayna waa **640** xubnood oo haween ah
- Barnamijka shaqo abuurka iyo kor u qaadista kobaca dhaqaalaha ee haweenka kasoo abaabul iyo wacyigalin loosameeyay (**Capacity Building and Mobilization for Women and girls Job Creation**) **3** Gobol Ee kala ah Faafan.Jarar, iyo Dawa Meelaha Lagakala Fuliay Degmada Xarshin, Degmada Gursum, Dedgmada Gashamo, Degmada Gunogado, Degmada Moyale Iyo Degmada Hudhet tirada xubnaha ka faa, idaystay waa **540** xubnood oo haween ah
- Waxaa**150** xubnood oo lagasoo kalla xulay dhamaan ururada kala duwan ee haweenka, sida ururka aqoonyahanka haweenka, ururka ganacsatada haweenka iyo dalada guud ee faradeeshinkahaweenka deegaank ayaa lasiiyay tabababar kusaabsan ka qaybgalka haweenka dhinaca siyaasada iyo hogaaminta kasoo laga qabtay gobolada Jarar Iyo Siti.
- Waxaa **400** haween ahlasiiyay tababar kusaabsan ka qaybgalka haweenka dhinaca nabadgalyada (**women participation in peace building process**) xubnahan tababarka

qaatay ayaa ayaa laga soo kalla khulay dagmooyinka xuduudaha kuyaala ee gobolka fafan iyo siti.

- Waxaa laqabtay tabar kusaabsan dabargoyinta gudniinka gabdhaha iyo gurka caruurta (ECM/FGM) tabaradan oo laga qabtay Gobolada Dhawa iyo Libaan (Hudhat, Mubarak, Moyaale, Qadhaadhumo, Dollo-ado, boqolmayo iyo Filtu). Lagu gaadhay 200qof (80lab iyo 120 dhadig).
- Waxaa tababar xalinta khilaafadka qoyska lasiiyay Ixubno dhan **240qof, (140lab iyo 100dha)** lagana hirgaliyay dagmooyinka gobolada Qabri/hahar iyo fafan (**dig, Higloolay, Marsin, Mula, Tuli goljano**).
- Waxaa laqabtay kulamo kala duwan iyo wada xaajoodka bulshada kuwaas oo **88** qabalee **15** dagmo ee mashruca **UNICEF**, wadaxaajoodkan oo ahaa mid hawlwadeenada bulshada (**social workerka**) iyo **CCC** qabaleeyada sii dhaadhiciyeen ayaa lagu gaadhay **6,800 xuubnood (4,200 dh iyo 2600 lab)** waxaana kasoo baxay in qabaleeyada qarkood go'aan laga gaadhay gudniinka **fircowniga** iyo guurka dagdaga ah (**come up with decision to end ECM/FGM.**).
- Waxaa ladhisay **8** xarumaha madaalada caruurta lagana dhisay Goobaha Barakacayaasha dagmooyinka Dekasuftu (barakaca Bundo qaran, Horseed,) Hudhet (Ceelmacaan), Dolo ado (barakaca Bukuraw), Erer (barakaca casbuli) Gota- biki. Waxaana ka faidaystay caruurdhan **10,000**.
- Waxaa qalabka waxbarashada loo qaybiyay gabadhaha iskuulada dhigta ee **6** dagmo (Gode, Fiq, Xamero, Baabile, MMJ iyo Awbare) qalabkaasodhana **1,000** bugaan, **1,000** qalinyo alaabta faya dhowrka ee gabdhaha.
- waxaa tabar xirfada nolosha ah loo qabtay **325** qoof (**1025lab iyo 2000dha**) xubnahaaso laga soo kalla xulay, (dartole, Awbare, Dhanan, q/dahar, Goday, cadaadle, Jarati, Dolo ado, Dolo bay, Fiiq, xamaro Gode, fiq, Hamero, Babile, Awbare),.
- Waxaa ladhisay **2** goobood oo gabdhaha iyo haweenka amaan u ah (women safe space) lagana dhisay dagmooyinka (Gode iyo Awbare) 6m x 7m iron sheet) islamarkaasna gabdhahu kulamo kala duwan kuyeeshaan,

- Waxaa lasameeyay kormeer iyo taakulayn dhamaan mashaaricda xafiiska ee dhagmooyinka gobolka fafan, siti, Erer, Nogob, shabele iyo Kabridahar iyo dagmooyinkale ee mashaaricda hayadaha bahwadaagta ka hirgalaan.
- Waxaa lasoo kormeeray haweenka iyo caruurta xabsiga kujirta islamarkasna qado loo sameeyay xubno kabadan **50 hika 25** lagudoonsiiyay agaabsharafeedka haweenka oo dhamaystiran
- Waxaa bustayaal loo qaybiyay **100** qooyo oo laga soo kalla xulay qabaleeyada magaalada jigjigadhaman oo aad danyarh
- Xuska maalinka caalamiga ee haweenka (**March 8**) ayaa sanadkan loo xusiyay si kaduwan kuwi hore , waxaa lasameeyay deeq uruurin ay sameeyen Masuulinta xafiisyada heer deegaana iyo madax xafiseedyada xafiiska arrimaha haweenka ee **11** degmo ee gobolka Fafan deeqda lasoo uruuriyay oo dhanayd **3,700,000birr**, lacagtaasna waxaa lagu caawiyay barakaca coolaada galbeedka sitti , kusugan barakaca Casbuli ayaa deeqdaas loo siiyay Raashin, sharaab iyo dharkalla duwan loo siiyay bulshada barakacaas kusugan , xafladiina si meeqaamsare ah ayaa looguna qaada barakacaas.

21.Xafiiska Ciyaaraha iyo Dhallinyarada

- Waxaa la aas –aasay oo la dhisay naadiga “**club**” ka kubada cagta ee karmara kuwaas oo ka kooban **32** ciyaartooyo, **3** macalin & xubno caafimaad iyo guddiga boordiga hagaya, waxayna ka qayb galeen tartanka “beherawi liiga” eeka qabsoomay magaalada asala iyo tartankii wareega **2aad** ee lagu qabtay magaalada debra markos, waana qayb ka mid ah kor u qaadida ka qayb galka tartamada heer qaran ama dal.
- Waxaa laqabtay tartanka ciyaaraha kubada cagta horyaalnimada **11** ka degmo, tartankani oo socday muddo bil ah laguna qabtay caasimada degaanka ee jig-jiga, ayaa waxaa ka soo qayb galay 11 degmo ee ku soo guulaystay horyaaladii degmooyinka gobolada, waana markii ugu horaysay ee tartanka noocan ah la qabto, waxaana ciyaartii kama danbaysta isugu yimid degmada raaso iyo degmada doolo addo waxaana guulaysatay degemada raaso.

- Waxaa si guud loo aas aasay ururada kala duwan ee fadareeshinada, kuwaas oo kala ah: - ururada kubada kolayga, kubada gacanta, wushuuga ee heer deegaan, sidoo kale waxaa sidoo kale la aas aasay ururada kubada cagta, kubada laliska ah iyo kuwa orodka ee ciyaaraha fudud ee “athelet”
- Waxaan ka qayb galnay tartanka orodka ee sululta kaas oo aan kaga qayb galnay **11** xubnood oo ay **2** dumar yihiin waana markii **11** aad ee aan ka qayb galno anagoo ku soo guulaysanay kaalmaha **4aad**, 5aad & 6aad waxaana ka soo qayb galay wadamada bariga afrika oo ay ka mid yihiin koonfur suudaan, jabuuti & ruwaanda.
- Waxaan ka qayb galnay tartanka orodka “project” yada, tartankaasi oo dhalinyarada da’doodu ay u dhaxayso **18-20** jirada ah, tartankaasi oo lagu qabtay degaanka oromiya ee magaalada asala, waxaanan ka qayb galay **16** xubnood oo ay 5 dhadig **11** lab ah.
- Waxaa la qabtay tartanka orodka ee maalinta nabada kaas oo ay kasoo qaybgaleen **110** xubnood lab **80** dhagid **30** iyadoo la abaalmariyay xubnaha kaalmaha **1aad -3aad** galay rag iyo dumar
- Waxaan ka qayb galnay tartanka kubbada cagta ee dhalinyarada ee iskuulada oo ay da’doodu ka hoosayso **15** jirada, kuwaas oo laga soo xushay iskuulada, waxaana iska kaashaday xafiiska waxbarashada heer degaan & xafiiska dhalinyarada & ciyaaraha, waxaan soogalnay kaalinta 3aad iyada oo aan kaga qayb galnay **30** xubnood.
- Waxaan kaqaybgalnay tartanka ciyaaraha fudud ee heer qaran ee barnaamijka dhalinyarada da’da soo koreysa ee **17** jirada kaas oo kaga qaybgalnay **15** ciyaartoy ah **12** lab iyo **3** dhadig waxan kasoo hoynay **2** dahab ah **1** mar ah **2** naxas ah guud ahan **5** biladood iyadon kalinta **2** bad a soogalnay dhaman kilalada.
- Waxan abaalmarino la siiyay ciyartooyadii kaalmaha keenay iyo dhamaan kooxdii kaqaybgashay tartanka ciyaaraha fudud ee projectiyada da’doodu yihin **17** jirada.
- Waxaa ka qayb galnay tartanka ciyaaraha shaxda “**chess**” -ka ee heer qaran kaas oo ay nooga qayb galayeen **5** xubnood kaas oo ka dhacay addis ababa, waxaan ka soo hoyinay bilad naxaas ah

- Waxaa aan kaqaybgalnay tartanka dadka baahiyaha garka ah qaba ee hawasa waxaana ka qayb galay **25** xubnood oo ay **16** lab yihiin **9** dhadig ay yihiin.
- Waxaa la qabtay orodwaynaha **12** ee loogu magic daray halgamaa sayid maxamed cabdile kaas oo lagu qabtay caasimada dds ee jijiga iyadoo la abaalmaryay orodyahanadii kaalmaha 1aad iyo 3aad kuwaas oo isgu jiray lab iyo dhadig waxayna dhanayeen **350 (250 lab & 100 dhadig)**
- Waxan qabanay tartanka kubada cagta dhalinyarada cuslaatay kaas oo ay kaqayb qateen **16** kooxod waxana kaalmaha 1aad baxay naadiga kubada cagta ee jaraaqato sidookale waxa kalinta 2aad baxay naadiga **01stars** halka kaalinta 3ad ay baxay naadiga wiilwaal iyadoo la abaalmaryay kaalinta 1aad, 2aad iyo 3aad.
- Waxaa noo qabsoomay tartanka maamul magaalooyinka kaas oo ay ka soo qayb galeen **6** mm iyo jaamacada jig-jiga, waxaana tartanakaasi koobka ku guulaystay maamulka magaalada jig-jiga.
- Waxaan ka qayb galnay tartanka horyaalmimda ciyaaraha fudud oo lagu qabtay adiss ababa, waxaana nooga qayb galay **11** orodyahan oo ay **10** lab & **1** dhadig.
- Waxaan ka qayb galnay tartanka wushuuga oo ka dhacay magaalada harar, kuwaas oo aan kaga qayb galnay **33** ciyaartoy, **15** dhadig & **8** lab, waxayna soo hooyeen **21** biladood **3** dahab **5** lacag **13** naxaas ah & **3** koob.
- Waxaan ka qayb galnay tartanka orodada ee horyaalmimada itoobiya ee kadhacay addis ababa waxaan kasoo hoynay anshax wanaag
- Waxaa la qabtay tababarka shuruucda iyo awaamiirta lagu hagayo tartanka kubada cagta ee 11ka degmo iyada oo loo qabtay awbare, ayshica, doolo ado, raaso, qabridahar, mooyaale, wardheer, dhuxun, dhanaan iyo lagahida, iyada oo ujeedadeeda tababarkani u yahay sidii doorkooda ay uga soo bixi lahaayeen dadka tababarka la siiyay xiliga ciyaaraha, waxaana kasoo qaybgalay **44** xubnood oo ka kala socday **11**ka degmo.
- Waxaa taakulayn dhinaca farsamda & shuruudaha ciyaaraha laga siiyay maamulka magaalada jig-jiga intii ay ciyaaraha maamulka magaaladu ay socdeen

22. Xafiiska Curinta Iyo Technology

- Waxaa qorshaysnaa in la dhameeystiro xaruunta barbaarinta Ganacsiga ICTga sanadka 2015 balse wuxuu marayaa 89%
- Waxaa qorshaysnaa in la dhameeystiro mashruuca Horumarinta Xoolaha oo ay iskaashanayaan xafiiska, Jaamacada Jigjiga iyo xafiiska heer Federaal balse maraya 58%
- Waxaa qorshaysnayd in la dhameeystiro hirgalinta nidaamka maareeynta iyo kaydinta xogaha ardayda 16 kuliyadood balse 100% waa la dhameeystiray
- Waxaa lagu guulaystay dhameeystirka mashruuca balaadhinta xaruunta kaydka xogta ee xafiiska
- Waxaa 100% la dhameeytiray mashruuca taageerida iyo taakulaynta abaalmarinta dadka wax curiya (innovaters)
- In kaabayaasha Assaasiga ah ee Sektorka Curinta iyo Teknolojiyada Lagaadhsiiyo 10%
- In kor loo qaado tababarada Curinta iyo horumarinta Tiknoolajiyada lana gaadhsiiyo 15%
- In la xoojiyo xidhiidhka iskaashiga lanagaadhsiiyo 25%
- In kor loo qaado heerka gudbinta tiknoolajiyadaha lanagaadhsiiyo 20%

23. Dhaqanka iyo Dalxiiska

- Waxaa la qabatay Dood-Cilmiyeedka Ilaalinta Dhaqanka degaanka sidii kor loogu qaado garaadka aqooneed xirfadlayaasha xafiisyada bah-wadaagata la ah xafiiska Sidoo kale waxaa la sameeyay Daraasaadka guur dhaqameedka iyo cunto dhaqameedka.
- Waxaa kormeer iyo dabagal lagu soo sameeyay lana soo diiwaan-galiyay goobaha (**aataarta**) taariikhigaah ee deegaanka Ee **faafan** iyo **Shabeele** waxaana laso diwangaliyaya 8 Aataar oo goboha taariikhiga ah.
- Waxaa Daraasaad lagu soo sameeyay Lahjadaha culus ee Af-soomaaliga ee degaanka gaar ahaan ku waas oo kala ah kuwo adag iyo kuwo fudud Gobolada **Afdheer, Libaan** Lahjadahaas oo kala ah **Garamaraha, Duubada iyo Gariiraha** si loo ogaado sida ay lahdadaha ay kala yihiin waxaana lagu soo sameeyay xog-ururin waxaa natiijo ah oo ka soo baxay daraasaddaas saddexdan lahdadood ee culus inay isticmaalaan kuwa ka duwan lahdadihii culusaa ee hore ee kala ahaa **Maxaatidhi** iyo **Maay** halka ay labada lahdadood ee Gariire iyo Garre-mare isticmaalaan **Meetiri**, lahdadda Duubaduna ay isticmaasho **Meetidhi**.
- Waxaa qorshaysnaa in daraasaad lagu soo sameeyo goobaha **dalxiiska** ee Deegaanka, waxaana loo kala diray kooxo isku dhafan oo is kugu jira **khabiirada** Xafiiska iyo khabiiro ka socdey wasaarada **dalxiiska ee Federalka kuwaas** oo loo kala diray Gobolada **Afdheer, Sitti, Iyo Erer**, si ay usoo daraaseeyaan goobaha **dalxiiska** ee **Siti** si loo diiwaan galiyo ha'ayada **UNISCO** ee caalamka waxana laga soo qoray **3 kamid ahdooxeedka Erer, buurta siti iyo muqaalka dhuled ee celkakari gobolka** afdheer waxay lagu so ogaday **20** khyraadka dabiciga **,9** goobaha diimeedka ee qarniga **13** gobaha aatarta ee taariikiga.
- Waxaan daraasaad kusoo samaynay **3 gooboha cusub dalxiiska** ku haboon ee deegaanka wixii noo qorshaysnaa sida: **-Erer, Afdheer, Siti** waxaana fulinayey daraasada khabiiro iskugu jira federal iyo deegaanka waxayna soo xuleen gobo cusub oo muhiim ah.

- Waxaa lagu soo ogaaday daraasadaas in goobo kaladuwan jiraan kuwaas oo khayraad badan oo deegaanku leeyahay oo aan horay loo ogayn hadda ka hor loona baahanyhay in la ogaado lana horumariyo (**khyraadka dalxiis taariikh, durjoog iyo dhaqanka**).
- Mashruucani muhiimaddiisu waa **sixitanka looxadaha (Boodhasha)** deegaanka gaar ahaan kuwa maamulka magaalada Jigjiga sidii loogu qori lahaa sadarka koowaad afka hooyo oo badhax tiran wacyigalin badan kadib qaybo ka mida. Waxayna bulshadu ka dhaga adaygeen in ay baddalaan bodhashi dibna waxaana loo jaray ganaax **478** iskugu jiran meherado iyo hotelo, dhamman goobihi ganacsiga lagana soo xareeyay dakhli **4,326,000birr** ka badan ooy badankood soo xereeyen ganaaxa lacagta.
- Waxaa tababar loo qabtay qeybka mid ah bulshada ku nool agagaarka seerraha maroodiga ee seddexda degmo Fiiq, Mayomuluqo iyo Baabaili si garaadkooda aqooneed ee la xidhiidha dalxiiska kor loogu qaado looguna wacyi galiyo ilaalinta iyo daryeelida khayraadka duurjoogta ku nool dhulka iyo seeraha maroodiga tirada kasoo qabgalay **wa 52 qof 100%** wu qabsomay.
- Waxaa noo qorshaysnaa inaan diyaarino **documentary film** ka turjumaya dhaqanka, dalxiiska iyo khayraadka deegaankeena kaaso ujeeddadiisu tahay kor u qaadida dalxiiska maaddama muhumadda la siinayo dhanka dalxiiska wuxuna ku jira xayasinti SRTV dhoowan waa la soodaan.
- Waxa noo qorshaysnayd inaan sameyno daraasaad ku saabsan **taariikh nololeedka Xawo Axmed Yusuf(Xawo Taako)** muhiimaddiisu waa sidii loo ilaalin lahaa taariikhda dadka Soomaaliyeed gaar ahaan taariikhdii Xaawa-Taako si ay bulshada qaybaheeda kala duwani u barato taariikhda halgamaayasha, jiilasha dambana loo gaadhsiiyo.
- Waxaa qorshaysnayd in shaqaalaha xafiiksa la kobciyo garaadkooda aqooneed si ay bulshada u siiyaan adeeg hufan, waxaa la siiyay tababar dhinaca qorshaha, kormeerka iyo diyaarinta warbixinada, iyadoo tababarkan la siiyay agaasimayaasha, madax kooxeedka iyo khabiirada xafiiska waxana tababrka la siiyaya **55 qof** oo shaqalaah ah.
- Waxaa la qabtay tartanka gabyaaga deegaanka oo sanad walba la qabto waxaa loogu tala galay inay ka soo qayb galaan bahda hal-abuurka iyo suugaanta waxaa qorshaysnayd **50qof** waxaa ka soo qaybgalay **30 qof** kaalinta **1aad, 2aad iyo 3aad**

waxaa la siiyay shahaadooyin iyo abaalmarino u dhiganta kaalmaha ay kala galeen inta kalana waxaa la siiyay shahaadooyin ka qaybgal ah **100%** wu qabsomay.

- Wuxuu xafiisku daabacay kaltirsiga iyo buugga ajandaha kuwaas oo lagu gudbiyo waxqabadka, xogta xafiiska iyo khayraadka deegaanka waxaa la daabacay **250 kaltirsiga** iyo **400** oo **buugga ajandaha** ah dhamaanna la gaadhsiiyay xafiisyada heer degaan.
- Wuxuu xafiisku daabacay buugga maahmaahyada oo sannadkii hore la sameeyay uruurintiisa ayuu sannadkan ka daabacay 300 oo nuqul ama buug oo ay buuggiiba ku kaydsan yihiin 3200 oo isugu jira dhammaan dhudleyda iyo tirooleyda maahmaahyadu.
- Wuxuu xafiisku qabtay doo-cilmiyeedka arragtida dadweynaha iyo bah-wadaagta ee la xidhiidha saameynta aaladaha casriga ah ee dhaqanka kaas oo lagaga doodayey dhibaatooyinkooda gaar ahaan aaladda Tigtoogga iyo sidii looga hortagi lahaa saameynahaas.
- Waxaa xafiiska u qorshaysnayd in uu dabagal iyo kormeer ku sameeyo mashaariicda waaweyn si loo ogaado heerarka ay marayaan, caqabadaha hor taagan, baahiyahooda iyo miisaaniyadda inay u isticmaaleen sidii loo baahnaa iyo in kale.
- Waxaa xafiiska u qorshaysnayd in uu soo daabaco 250 jaldiyada shati-bixinta adeeg-bixiyayaasha dalxiiska waxaana loo qabtay hawshaas sidii loo baahnaa.
- Xafiiska waxaa u qorshaysnayd inuu sameeyo magac-bixinta halku-dhigga dalxiiska deegaanka waana la sameeyay.
- Xafiiska waxaa u qorshaysnayd inuu ka qaybgalo xusaska heer qaran iyo heer caalami sida: Xuska dalxiiska adduunka, xuska hidhaar 29, xuska toddobaadka dhaqanka iyo xuska maalinta isku-dulqaadashada oo uu xafiisku sidii loo baahna uga qayb galay.

24. Xafiiska Warfaafinta

Soo uruurinta ra'yiga dadweynaha

- Waxaa la soo aruuriyay rayiga dadweynaha ee ku aadan waaqiciga xiligaa taagan kaas oo ay bulshada ku soo bandhigayso afkaartooda ku aadan mawduucaas, taasi oo gashi u noqoneysa in laga jawaabo baahiyaha dadweynaha lana ogaado afkaarhooda.

- **Diyaarinta muqaalada waxqabadka xukuumada (documentary films)**
- Waxaaa la diyaariyay muuqaalo (documentary films) kala duwan kuwaasi oo bulshada loogu soo bandhigaayo muhiimada iyo ka faaideysiga kheyraadka deegaanka iyo waxa qabadka xukuumada, sida dhaqo oo dheefso, Dalag iyo daryeel, heer daboolka biyaha IWM, si bulshada deegaanka ay ula socota xaqiiqada dhabta ee ka jirta deegaanka.

Dabagalka warbaahinta maalinlaha ah ee deegaanka dalka iyo caalamka:

- Waxaa si maalinle ah loo dabagalaa warbaahinta kala duwan ee tabinta ilawareedyada social media iyo TVyada iyagoo loo kala saaro kuwa togan iyo kuwa taban, ka dibna lagaga talaabo qaadanaayo si bulshada deegaanka looga ilaaliyo ila wareedyada keeni kara isku dhac iyo marin habaabinta shacabka shacabka ah.

Diyaarinta iyo soosarida wargays (magazine) ee xiliile ah ee Shabeele

- Waxaa la soo saaray islamarkaana bulshada la gaadhsiiyey **8000** oo nuqul oo wargeyska shabeele (magazine) ah, kaasi oo bulshada loogu soo bandhigaayo xogaha muhiimka ah iyo natiijooyinka ay dawladdu ka soo hoysay qorshayaasha waxqabadka xukuumadda.

Diyaarinta iyo soo saarida jaraa, idka ee Hawraarsan

- Waxaa la soo saarey islamarkaana la qeybiyay in ka badan **24,000** oo nuqul oo ah **jaraa, idka hawraarsan** ee ka soo baxa xafiiska warfaafinta, kaasi oo bulshada loogu soo bandhigaayo xogaha muhiimka ah iyo waxqabadka dawladda

Diyaarinta iyo hirgelinta nidaamka Heeraynta iyo Xakaymaynta Aaaladaha casriga ee warbaahinta

- Waxaa la turjumay xeerar iyo habraacyo lagu xakameynaayo heerka fasaxa ee Warbaahinta casriga ah ayadoo laga duulayo in Bulshada aanan lagu marin habaabinin xogo been abuur ah
- Turjumida Bayaanka ka hortaga hadalada naceybka iyo fidinta xogaha been abuurka ah tirsiiigu yahay 1185/2012
- Waxaa la sameeyay habraacyada duwangalinta iyo fasax siinta warbaahinta
- Turjumida xeerka anshaxa wariyaasha iyo warbaahinta
- Daraasad ku saabsan dhaqan galinta shuruucda iyo sababta loogu baahday
- Turjumida Bayaanka xayaysiiska (**Advertisementproclamation**)

Abaabulka qabashada fagaarayaal iyo dood celmiyeedyada:

- Waxaa la qabtay fagaarayaal kor loogu qaadaayo wacyiga bulshada taas oo ay bulshada isku waydaarsanayeen afkaarahooda ku aadan xaaladaha waqtigaa taagan, si bulshada deegaanka aanan looga dhexfaafinin afkaaraha qaldan.
- Waxaa dayactir lagu sameeyay xafiiska wasiirka ayadoo laga dayactiray hawl fulinta xafiiska kaasi oo markii hore ahaa mid aan ku habooneyn goob shaqo.

Rogida iyo casriyeynta xogta cajaladaha gaboobay:

- Waxaa qaab casri ah loo rogay cajaladihii keydka ahaa ee la duubay xiliyadii hore kuwaasi oo ku keydsanaa cajalado aan la jaanqaadi Karin qaabkan casriga ah iyagoo lagu keydiyay aaladocasri ah, kuwaasi oo gashi weyn iyo marqaati nool u ah sooyaalka taariikheed ee deegaanka.

25. Xafiiska Adeegga Shacabka

Kor-u-qaadidda Nidaamka Adeeg-bixinta Xafiisyada Dawaladda

- Dhinaca Adeeg bixinta Xafiisyada Heer Deegaan oo isbadal muuqda laga dareemayo kadib Kormeerkii iyo Taakulayntii uu xafiisku kasameeyay.
- Waxaa Taakulaynta iyo Kormeer kusaabsan Hirgalinta Xidhmada Dib-uhabaynada iyo Maamulka suuban laga sameeyay **61 xafiis** ee Heer Deegaan oo **4 Rubuc** ah
- Waxaa ladiyaariyay nuqulada waydiimaha Daraasaadka Adeeg bixinta iyo Tilmaan bixiyahooga ee Xafiisyada Deegaanka
- Waxaa la qabtay kulanka wadatashiga ee Soojeedinta Dhaliilaha-warbixinta ka jira hirgalinta Xidhmada Maamulka Suuban iyo Dibuhabaynada, Siinta Tababarka fikirka guud ee ilaha dulsaarnimada oo loo qabtay **61 xubnood** oo ah Gudiga Dib-uhabaynada Heer Deegaan
- Qabashaha Tababarad kusaabsan Xidhmooyinka Dib u habaynada oo fikir guud iyo dib u xasuusin loo sameeyay Xafiisyada Heer deegaan taasi oo hada laga dareemayo sida ay hada ufulinayaan Nidaamka Refom tools.DS iyo guud ahaan habka uu waxqabadku u fulay.

Xoojinta Nidaamka Qaab-dhismeed iyo Nidaamka Maamulka Cududda Shaqaalaha

- Waxaa la dhamaystiray Qaaab dhismeedayada Xafiisyada heerarkooda kala duwan oo isugu jira Heer Deegaan, Heer Degmo, iyo Heer Tuulo oo dhan **187**.
- Waxaa lagu shaqaalaysiisay shaqaale cusub Xafiisyada heerarkooda kala duwan oo isugu jira Heer Degmo M. Magaalo oo dhan **2949**, Sidoo kale waxaa Dalacsiin iyo Mushaar kordhin wakhti (Irkin) loo sameeyay shaqaale kashaqeeya xafiisyada kaladuwan oo isugu jira Heer Deegaan, Degmo Iyo M. magaalo oo dhan **546** oo xubnood.

Kor-u-qaadidda Nidaamka Cabasho iyo sugida xuquuqda shaqaalaha iyo Dabagalka.

- Waxaa lasoo ururiyay shaqaalaha **Ghost**(fakadka), Double employment iyo Forgit-ka oo dhan ah **878**, lagana soo ururiya Xafiisyada Heer Deegaan, Degmo ee Gobolada Afdher, Shabelle, Nogo, Sitti, iyo M. magaalooinka, iyada oo la babaadiyay lacag dhan **32,040,475 Birr**
- Waxaa Tababar lagu baranayo Nidaamka Xalinta Cabashooyinka iyo anshaxmarinta shaqaalaha dawlada loo qabtay Gudiyada Cabashooyinka ee Xafiisyada fulinta kuwaasi oo ka koobna 81 xubnood

Adkaynta kartida fulineed ee cududa shaqaalaha iyo hogaaminta sare

- Waxaa lacagtii waxbarashada iyo kharashaadka kale ee taageerada (Pocket Money) laga bixiyay Arday iyo shaqaale baranaya Feildiyada kaladuwan, iyada mudnaanta la siinayo Culuunta Caafimaadka oo dhan **691** xubnood oo isugu jira Waxbarashada Heerka 1aad, 2aad iyo 3aad.
- Waxaa tababar kusaabsan ‘performance appraisal and management’ loo qabtay shaqaale gaadhaya 57 oo ka kala socda waaxaha maamulka shaqaalaha ee xafiisyada heer deegaan

Kor-uqaadiada Adeeg bixinta iyo Hirgalinta ee kaalinta Bahda Adeega Shacabka (Kuliyadda)

- Waxaa Kuliyada Adeega Shacabka loo Diyaariyay waxna laga badalay shuruucda kaladuwan, Siyaasadaha, Qorshayaasha **10** sano Dhismaha iyo Bilacda, Qaabdhismeedka iyo Naqshadaynta Manhajka.

26. Xafiiska Qorshaynta

Qorshayaasha Guud Review Regional Short, Medium and longterms or amendements where necessary)

- Waxaa la dhammaystiray isla markaana la daabacay qorshaha **10ka sano**, Ee deegaanka, loona tujumay af-soomaaali.
- Waxaa la dhammaystiray isla markaana la daabacay qorshaha **3sano**, kaas oo laga soo dhexsaaray qorshaha **10 sano** ee degaanka lana daabacay ayadoo markii la dhameeyay xafiiyada heer degaan lala wadaagay si ay saktarudu wixii talo-bixin ah uga soo bixiyaan waana la isla-qaatay.
- Waxaa taageero iyo taakulayn laga gaystay diyaarinta qorshaha horumarka iyo miisaaniyadda ee **93 degmo iyo 6 maamul-magaalo**. Kaasoo lagu qabtay **lix saktar/goobood**,
- Waxaa la isku dubariday qorsh-howleedka SM 2015 ee Xafiisyada heer deegaan, isla markaana waxaa loo habeeyey hal bug.
- Taageerada iyo ka-qaybgalka qorshayaasha muhiimka ee heer deegaaniyo diyaarinta qorshaha **u-adkaysiga** khataraha masiibooyinka (**Multi-year Resileience Plan**) –wuuna gabagaboobay wuxuuna diyaar uyahay daah-fur & dhaqangalin.
- Diyaarinta qorshaha horumarka ballaadhan (**Regional Development Spatial Plan**) gaar ahaan diyaarinta daraasadda bilowga ee aasaaska u dajinta qorshaha faahfaahsan (**Situational Analysis**) oo ay gacanta kuhayso hayada UN OPS & xafiiska horumarinta dhismaha magaalooyinka.
- Waxaa la diyaariyay habraaca qorshaha 2016 T.I Iyo Habraaca Warbixinta wax-qabadka 2015 T.I Sidoo kale waxaa la diyaariyay qorshaha S.m 2016 T.I ayadoo la raacaayo Tilmaamahii ay bixisay xukuumada degaanku (**Priorities**)
- Waxaa la diyaariyay Halbeegyada Muhiimka ah Ee Xafiisyada kaladuwan sidoo klae waxaa la diyaariyay hal-qorshe iyo hal-warbixin oo midaysan (**One plan one report principle**) kaaasi oo lagu saleeyay qorshaha S.M 2016 T.I iyo Warbixinta Wax-qabadka S.M 2015.

Kormeerka, dabagalka, qiimaynta iyo taakulaynta mashaariicda horumarinta & kaabayaasha dhaqaalaha:

- Waxaa kormeer, dabagal, iyo taakulayn lagu soo sameeyay dhamaan mashaariicda xafiisyada heer degaan ay ka fulinayaa Gobolada Maamul-magaalooyinka iyo Degmooyinka ayadoo kooxo loo kala diray xafiisyada heer degaan heer maamul-magaalo ilaa heer degmo ayadoo laga duulaayo qorshe-hawleedkii ama jadwalkii shaqada ay dhigteen saktarada kala duwan kaas oo u jajabsanaa **rubuc** laguna qiimeeyay waxqabadkii 12 bilood Ee S.M 2015
- Waxaa la fuliyay qiimayntii rubuca 1ad, 3aad & lixdii bilood ee SM 2015
- Waxaa la diyaariyay warbixinta waxqabadka ee saktarada kala duwan ee heer deegaan ee **4 sano** ee lasoo dhaafay mashaariicaha la dhisay (2011 - 2014 T.I.)
- Waxa la diyaariyey shax sharxaysa mashaariicda dhismaha ee SM 2015 kuwooda la odorasayo inay dhammaadaan SM 2015 iyo kuwa u gudbaya SM 2016

Daraasadaha iyo Falanqaynta Xogaha horumarineed iyo Arrimaha Dadweynaha

- Waxaa la dhamaystiray buugga **Atlas/Resource Mapping**, Lana daabacay iyadoo laga duulayo xogihi laga soo ururiyay dhamaan gobolada, degmooyinka iyo Maamul Magaalooyinka kadib falanqayn dheer iyado la adeegsanayo **GPS, GIS, GOOGLE EARTH ILM.**
- Waxaa la dhamaystiray buugga **Physical and Socio-economy Profile**, Lana daabacay iyadoo la adeeg sanayo xogihi laga soo ururiyay dhamaan gobolada, degmooyinka iyo Maamul Magaalooyinka.
- Waxa la diyaariyay lana daabacay buugga tilmaamaha horumarka deegaanka (**Development Indicator Brochure**) iyado laga duulayo xogihi deegaanka laga soo ururiyay kadib falanqayn lagu sameeyay natiijadi laga helay.
- Waxa la dhamaystiray in la daabacana diyaar u ah Qiyaasida wax-soo-saarka Deegaanka (**Regional GDP**) 2014 TI, kadib xog-ururin, galin iyo falanqayn laga sameeyay macluumaadki la soo helay.

Kobcinta awoodda shaqaalaha Xafiiska qorshaynta ee dhinaca diyaarinta qorshayaash, qiimaynta iyo dabagalka (Taageerada UNDP): -

- Waxaa Qabsoomay tababar la siiyey **100 qof** oo ah Agaasimiyaasha iyo madax-kooxedyada Qorshaynta xafiisyada heer deegaan, kuliyaadaha, komissionada iyo wakaaladaha (**Maaraynta Meeratada Mashaariicda (PCM)**, **Maaarynta ka midho-dhalinta natiijada ku salaysan (RBM)**).
- Waxaa qabsoomay tababar laba qaybood ah oola siiyey **58 xubnood** oo ah shaqaalaha Xafiiska Qorshaynta laguna taba-baray (**Maaraynta Meeratada Mashaariicda (PCM)**, **Maaarynta ka midho-dhalinta natiijada ku salaysan (RBM)**, fikirka horumarka dhaqaalaha iyo diyaarinta warbixinaha iyo habka diyaarinta xifadaha qoraalada
- Waxaa la diyaariyay qabyo-qoraalka bayaanka Diyaarinta iyo baahinta bayaanka qaabka Maamulka iyo Maaraynta Mashaariicda guud ee dawladda iyadoo lala kaashanayo Xafiiska caddaaladda. Waxaana gundhig looga dhigay bayaanka heer Federal kaasi oo meel fiicana maraaya

Diyaarinta iyo dhisida nidaamka kaydinta xogaha horumrineed ee deegaanka (Establishment integrated management information System for REDATAM database):-

- Waxaa la soo iibiyay qalabyada muhiimka ah Ee loogu talagalay in loo isticmaalo database **REDATAM**.
- Waxaala soo ururiyay xogta aasaaska u noqonaysa nidaamka kaydinta xogta, kaasoo laga soo ururiyay Xafiisyada heer Deegan taas oo kusalaysan halbeegyada Wax-qabadka muhiimka ah (**Key Performance Indicators**)
- Waxaa la diyaariyay muqaalka uu yeelanaayo kaydiyaha xogta halbeegyada wax-qabadka muhiimka ah (**KPI**) Ee **REDATAM Database**-ka Deegaanka.
- Waxa tababar gaar soo qaatay qaar ka mid ah shaqaalaha Xafiiska kuwaasoo 10 cisho ka qayb galay tababar ay diyaariyeen Wakaaladda Tirokoobka Itoobiya (CSA) iyo Wasaaradda Qorshaynta Fadaraalka.

27. Xafiiska Maaliyadda DDS



Dhinaca kobcinta awooda fulineed ee maamulka maaliyadeed.

Waxaa sanadkan qabsoomay tababarada kor-loogu qaadayo awooda fulineed iyo aqoonta xirfadaha la xidhiidha nidaamka diyaarinta iyo maamulka miisaaniyada, nidaamka xisaabaadka ee laba tibix laha ah, nidaamka kharash bixinta iyo maaraynta lacagta cadaanka ah, shuruucda iibka dawlada iyo hantidhowrka gudaha, nidaamka isticmaalka alaada casriga ah ee afka qalaad loo yaqaano **Integrated budget and expenditure system (IBEX)**. Waxa tababaradan kala duwan la siiyay shaqaalaha madaxa xafiisyada maaliyadaha degmooyinka, shaqaalaha qorshaynta, xisaabaadka, hantidhowrada gudaha iyo iibka ee dhamaan xafiisyada heer deegaan, degmooyinka iyo maamulada magaalooyinka oo ay ku jiraan cisbitaalada, kuliyaadaha, dugsiyada hoyga iyo goboladu. Sidoo kale waxaa wacyigelin iyo tababarka nidaamka maamulka maaliyadeed lasiiyay shaqaalaha ay khusayso ee dhamaan degmooyinka iyo maamulada magaalooyinka, tirada shaqaalaha la taba-baray sanadkan waa 1265 xubnood.

Waxaa taageero farsamo oo la xidhiidha guud ahaan dhinacyada maamulka maaliyadeed ee nidaamka diyaarinta iyo maamulka miisaaniyada, nidaamka xisaabaadka ee laba tibix laha ah, nidaamka kharash bixinta iyo maaraynta lacagta cadaanka ah, shuruucda iibka dawlada iyo hantidhowrka gudaha, nidaamka isticmaalka alaada casriga ah ee IBEX la siiyay dhamaan degmooyinka iyo maamul-magaalooyinka, halkaas oo lagu turxaan bixinayay ciladaha farsamo ee la soo derista degmooyinka sanadka gudihiisa, si loo adkeeyo nidaamka maamulka maaliyadeed oo tayo leh.

Waxaa la dhamaystiray laguna soo xidhay xarunta xogta (Datacenter) ee xafiiska maaliyada sodon (35) goobo maaliyadeed oo ku kala yaala gobolada. Taas oo tirada goobaha ku xidhan xarunta xogta ee maaliyada ka dhigaysa 89%.

Waxaa dabagalka isticmaalka (User Audit) iyo taageero farsamo lagu sameeyey 8 gobol oo isticmaala nidaamka khadka tooska ah ee IBEXka, goboladan oo kala ah Fafan, Jarar, Doolo, Qoraxey, Shabele, Afdher, Erer iyo Nogob kuwaas oo isticmaala Khadka tooska ah.

Waxaa Xarunta Xogta (Datacenter) ee xafiiska maaliyada lagusoo xidhaday 35 goobood oo iskugu jira goobihii hore looga hirgaliyey VSAT ka iyo Goobaha Cusub,

Waxaa lagasoo uruuriyey Xogta kaydka (Backup) iyo xogo kalaba goobaha aan Onlineka ahayn ee Gobolada Liban iyo Daawa.

Waxaa hirgalintooda la dhamaystiray lana soo kormeeray xadhkaha Fiber opticga ee laga hirgaliyey 22 goobood oo isticmaali jiray xadhkaha Khadka ee xawaarahoodu hooseeyo Waxaa la shaqaaleeyay 47 degmo shaqaalahooda oo kala ahaa xisaabaadka iyo kasheerada mashruuca Badbaadada waxsoosaarka (PSNP 5).

Guud ahaan waxaa 12 ka bilood ee sanad miisaniyadeedka 2015 lasoo baadhay 180 xafiis (109 heer deegaan, 65 degmo iyo 6 maamul magaalo).

Waxaa baadhitaanka kadiska ah lagu sameeyay 10 degmo oo ka tirsan gobolada doolo, jarar, Afdheer iyo nogob oo kala ah degmada Danood, daraatoole, Awaare, Gashaamo, Cayuun, Garbo, Ilahorshagax, Qooxle, godgod iyo baaray.

Waxaa 52 xafiis, wakaalado iyo komishino heer deegaan ah lagu sameeyay tirakoobka hadhaaga hantida SM 2014 T.I lana wadaagay dhamaan xafiisyada ay khusayso xogtii kasoo baxday tirakoobka. Waxaa la xaraashay gawaadhi dhan 72 gaadhi oo 13kamida ay ahaayeen bajaj force iyo 59 gaadhi oo isugu jira noocada kala duwan ee baabuurta. Waxaa kasoo xarooday dakhli dhan **55,434,534.74 birr**

Waxaa meel fiican maraya dhamaystirka dhismaha xafiiska kaas oo maraya heerka **99.10%** Guud ahaan waxaa jira in tiro dhan 73 gaadhi oo noocyada kala duwan ah ay qorshaysnayeen in lagu soo iibiyo qaab cashuur dhaaf ah kuwaas oo ay kala lahaayeen hayadaha dawlada heerarkooda kala duwan, daahitaan badan kadib waxaa uu xafiisku mariyay nidaamka tartanka furan waxaana ku guulaystay shirkad magceeda la yidhaa AM Import And Export, wakhti xaadirkan gaadiidku wuxuu yaalaa dekada jabuuti, mudo kusiman bil ay soo galayaan Jig-jiga.

Dhinaca iibka iyo maamulka hantida, waxaa hanti dhawrka iibka dawlada laga fuliyey 52 xafiis oo heer deegaan ah iyo 28 degmo iyo maamul-magaalo si kor loogu qaado nidaamka iyo ku dhaqanka shuruucda iibka dawlada. Waxaa la sameeyay hanti-dhawrka iibka ee mashruuca UIIDP ee maamul magaalooyinka Jigjiga, Degahbour, Gode iyo Kabridahar.

Tababarka maamulka iibka dawlada iyo maaraynta hantida maguurtada ah ayaa loo qabtay dhamaan shaqaalaha iibka ee xafiisyada heer deegaan iyo degmooyinka deegaanka, waxaa la tababaray shaqaale dhan 947 xubnood si kor loogu qaado garaadkooda aqooneed

Waxaa warqada cadaynta diwaangelinta tartamayaasha (supplier list certificate) la siiyay 1146 xubnood oo ah ganacsatada deegaanka

Dhinaca waxqabadka qaybta maamulka hay'adaha aan dawliga ahayn

- Waxaa la qabtay shir wada tashi ah (co-odination meeting) oo ay kasoo qaybgaleen hay'ada UNICEF iyo xafiisyada bahwadaagta la ah hay'adan.
- Waxaa la qabtay tababarka waxqabadka natiijada ku salaysan (RBM), taas oo ay naga caawisay UNFP.
- Waxaa heshiis lala galay 8 mashruuc oo ay ha'adaha aan dawliga ahayni ka fulinayaan deegaanka, kadib markii qiimayn (appraisal) lagu sameeyay, heshiiska oo dhan 189,202,990 oo Birr.
- Waxaa qiimayn Project Appraisal lagu sameeyay mashaariicda ay fulinayaan hay'adaha aan dawliga ahayn (NGOs), guud ahaan miisaaniyada ku baxaysa mashaariicdaas waxay dhan tahay Birr 1,695,957,791
- Wuxuu deegaankeenu martigeliyay markii koowaad shirka heer qaran ee ururada bulshada rayidka ah (Authority for civil society organizations), kaas oo ay kasoo aqaybgaleen 10 deegaan iyo wasaaradaha heer federal.

Isticmaalka Miisaaniyada guud ee DDS ee S.M 2015 T.I (Hamle/2014-Sane/2015 T.I)

1. Isticmaalka Dhinaca Miisaaniyadda Khasnada Dawlada (Teasury)

Nooca Miisaaniyada	Qorshaha miisaaniyadda S.M 2015 T.I	Isticmaalka miisaaniyadda dawlada S.M 2015 T.I	Isticmaalka (%)
Wadarta guud ee miisaaniyada dawlada	30,225,984,306.66	30,220,692,558.50	100%

Nooca Miisaaniyada	Qorshaha miisaaniyadda S.M 2015 T.I	Isticmaalka miisaaniyadda dawlada S.M 2015 T.I	Isticmaalka (%)
Miisaaniyada hiigsiga yoolasha waaraya (SDG)	1,397,200,000.00	1,397,200,000.00	100%
Miisaaniyada mashaariicda heer deegaan	11,382,978,474.70	11,377,686,726.54	100%
Miisaaniyada caadiga ah ee heer deegaan	8,576,747,599.85	8,576,747,599.85	100%
Kabista degmooyinka iyo maamulada magaalooyinka	8,869,058,232.11	8,869,058,232.11	100%

Faah-faahinta isticmaalka miisaaniyada dawlada ee S.M 2015 T.I

1. Miisaaniyada hiigsiga yoolasha horumarka waara (SDG), Qorshaha sanadku wuxuu ahaa **Birr 1,397,200,000**, waxa laga isticmaalay **1,397,200,000**, taas oo ka dhigan in **100%** la isticmaalay miisaaniyada.
2. Miisaaniyada Mashaariicda (Capital) ee xafiisyada heer deegaan wuxuu Qorshuhu ahaa sanadkan **Birr 11,382,978,474.70**, waxaa laga isticmaalay **Birr 11,377,686,726.54**, taas oo ka dhigan in **100%** la isticmaalay miisaaniyada.
3. Miisaaniyada caadiga ah ee mushaarka iyo hawlfulinta (recurrent budget) ee xafiisyada heer deegaan wuxuu Qorshuhu ahaa sanadkan **Birr 8,576,747,599.85**, waxaa laga isticmaalay **Birr 8,576,747,599.85**, taas oo ka dhigan in **100%** la isticmaalay miisaaniyada.
4. Miisaaniyada kabista ah (Subsidy budget) ee la siiyo degmooyinka iyo maamullada magaalooyinka, wuxuu Qorshuhu ahaa sanadkan **Birr 8,869,058,232.11**, waxaa loo shubay rubuca koowaad miisaaniyad dhan **Birr 8,869,058,232.11**, taas oo ka dhigan in **100%** loo shubay miisaaniyadooda (mushaar, hawlfulin iyo miisaaniyada mashaariicda).

Guud ahaan miisaaniyada dawlada ee heer deegaan iyo kabista la siiyo degmooyinka iyo maamulada magaalooyinka wuxuu qorshaha sanadku ahaa **Birr 30,225,984,306.66**,

waxaa laga isticmaalay miisaaniyad dhan Birr 30,220,692,558.50, taas oo kadhigan in 100% la isticmaalay miisaaniyada.

F.G: -

Miisaaniyada la qorsheeyay **S.M 2015 T.I,**dhinaca **dawlada** ee sare kuxusanwaxa ka maqan warbixintan dakhliga ay soo saaranayaan degmooyinka iyo maamulada magaalooyinka oo dhan **Birr 2,786,255,884.30** maadaama degmooyinka iyo maamulada magaalooyinku ay dakhliga ay lasoo baxaan ay iyagu isticmaalaan oo aan heer deegaan looga Shubin, sidoo kale waxa ka maqan miisaaniyada caawimada ah (on-budget assistance) oo dhan **Birr 205,220,048**, guud ahaan waxa ka maqan warbixintan miisaaniyad dhan Birr 2,991,475,932.30.

2. Miisaaniyada Barnaamijyada marinka koowaad (Channel 1)

Nooca Miisaaniyada	Qorshaha miisaaniyada sanadka 2015 T. I	Isticmaalka miisaaniyada sanadkan 2015 T.I	Isticmaalka (%)
Wadarta guud	5,475,582,643.60	5,377,719,021.41	98%
Barnaamijka kabida danyarta miyiga lacag ahaan (RPSNP)	4,305,239,691.58	4,298,470,332.43	100%
Barnaamijka shaqo abuurka ee kabida danyarta magaalada (UPSNJP)	399,769,718.38	315,939,265.60	79%
Barnaamijka kor uqaadista Tayada Waxbarashada (GEQIP) (adjusted)	199,844,799.84	198,890,402.29	100%
Barnaamijka nadaafada iyo fayodhawrka (WASH)	163,948,561.30	159,242,148.59	97%

Barnaamijka horumarinta magaalooyinka (UIIDP)	406,779,872.50	405,176,872.50	100%
---	----------------	----------------	------

Faah-faahinta isticmaalka miisaaniyada Barnaamijyada iyo mashaariicda marinka 1aad (Channel One programs)

- Mashruuca kabida danyarta ee miyiga **(RPSNP)**, wuxuu qorshuhu ahaa sanadkan **Birr 4,305,239,691.58**, waxaa laga isticmaalay **Birr 4,298,470,332.43**, taas oo ka dhigan in 100 % la isticmaalay.
- Barnaamijka shaqo abuurka ee kabida danyarta magaalada **(UPSNJP)** wuxuu Qorshaha sanadkan ahaa **Birr 399,769,718.38**, waxaa laga isticmaalay **Birr 315,939,265.60**, taas oo ka dhigan in laga isticmaalay 79%.
- Barnaamijka kor uqaadista tayada waxbarashada **(GEQIP)** wuxuu Qorshaha sanadkan ahaa **Birr 199,844,799.84**, waxa laga isticmaalay **Birr 198,890,402.29**, taas oo ka dhigan in 100% la isticmaalay.
- Barnaamijka nadaafada iyo fayodhawrka **(ONE WASH)** wuxuu Qorshaha sanadkan ahaa **Birr 163,948,561.30**, waxaa laga isticmaalay **Birr 159,242,148.59**, taas oo ka dhigan in 97% la isticmaalay.
- Barnaamijka horumarinta magaalooyinka (UIIDP) wuxuu Qorshaha sanadkan ahaa **Birr 406,779,872.50**, waxaa laga isticmaalay **Birr 405,176,872.50**, taas oo ka dhigan in 100% la isticmaalay.
- ✚ **Guud ahaanWadarta guud ee miisaaniyada marinka koowaad (Channel 1)** wuxuu Qorshaha sanadku ahaa **Birr 5,475,582,643.60**, waxaa laga isticmaalay **Birr 5,377,719,021.41**, taas oo ka dhigan in 98% la isticmaalay

3. Miisaaniyada Barnaamijyada hay'adaha qaramada midoobay

Nooca Miisaaniyada	Qorshaha miisaaniyada sanadka 2015 T.I	Isticmaalka miisaaniyada sanadka 2015 T.I	isticmaalka miisaaniyada (%)
--------------------	--	---	------------------------------

Barnaamijyada hay’adaha qaramada midoobay (UNEXCOM)	569,185,816.80	540,726,526	95%
--	-----------------------	--------------------	------------

Faah-faahinta isticmaalka miisaaniyada barnaamijyada hay’adaha qaramada midoobay (UNEXCOM) ee Channel one

- Barnaamijyada ay maalgeliyaan hay’adaha qaramada middobay ee marinka labaad (**Channel two**)wuxuu Qorshuhu ahaa sanadkan **Birr 569,185,816.80**, waxaa laga isticmaalay **Birr 540,726,526**, taas oo ka dhigan in **95%** la isticmaalay.

28. Xafiiska Dakhliga

- waxaa uu xafiiska SM 2015 u qorshaysnayd in uu soo ururiyo dakhli dhan **9 billion Birr** waxana lasoo ururiyey dakhli dhan **9.6 billion Birr** taso boqolayda ka dhigaysa **106%**, Dakhliga lasoo ururiyey sanadkan marka loo eego SM hore 2014 waxa dheeri laso ururiyey dakhli kor u dhafaya **2.4 billion** oo boqoley noqoneysa **33%**
- Hadaba xafiiska oo dadaal dheer galiyey in uu kor u qaado dakhliga gudaha aya waxaa uu xooga saaray sidi kor loogu qaadi laha loona casriyeyn laha nidaamka dakhli ururinta deegaanka iyado la hirgaliyey casri ah ah (**E-Tax.**) kasoo canshur bixiyeyasha u sahlaya in canshurta ku wajibtay lagu ogaysiyo nidaam fariin oo ogaysin ah sido kalena ay canshurta ku wajibtay ku bixin karaan nidaam casri ah (**E-Payment**) iyago isticmalaya telefankooda gacanta (**Tele Birr, CBE**) waxana wada hadal nosocdaa **Hellocash, Sahay, EBirr.**
- Waxaa sido kale la furay **10 xarumo** cusub lagu diwaangalinayo canshur bixiyeyasha dagmooyinka taso, Waxa sare loo qaaday nidaamka wacyigalinta canshur bixiyeyaha, Sareynta Sharciga & ku dhaqankiisa.
- Waxaa soo dhamaday wajiga 1aad ee lagu ogaanayay darasaadka awooda dakhli dhalined ee DDS kasooy fulinayso Ururka Dhaqalaha Itoobiya (**Ethiopia Economic Association**)
- Waxaa la diyariyey sidoo kale golaha fulinta deeganka soomalida ansixiyen; Bayaanka Gunada Isticmaalka Dhulka Miyiga & Canshurta Waxsoosaarka Beeraha ,Bayaanka

Xadaynta libka Canshuurta Xoolaha & Gunada Dhaqashada Xoolaha & , Bayaanka
Excise Tax

- Waxaa la diwangaliyey cashur bixiyayaal dhan **31,431** taso qabsonka qorahaha ka dhigaysa 104%
- Waxaa cashuurta VATka loo diwaangaliyey canshur bixiyayaal dhan **540**
- Waxaa MMJ la keeney **800** mashiinada diwangelinta iibka (**Cash Register Machine**) taso waxbadan ka badalaysa dakhli ururinta magaalada korna u qaadi doonta canshurta VATka.